
-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS



-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Shan Habeen!’

A Bile Hashi ...BOOK

Telegram @SOMALIBOOKS

Confidential



-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

International Standard Book Number(ISBN)

© BILE HASHI
ISBN 978-91-979744-2-4

GÖTEBORG SWEDEN 2011

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

UHIBAYN:

Akhristaheyga!

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

CUTUBKA KOOWAAD

Boorsadi uu xirxirtay ayuu sariirta kasoo qabsaday, wuxuu eegay in shinyeerku xiran yahay. Garabka ayuu saartay. Saacada ayuu eegay. Isagoo gadaal qolka usoo eegaya ayuu albaabki iska furay oo aqalki kasoo baxay. Markuu dibeda yimid wuxuu si toos ah talaabada ugu qaaday halki uu ku ogaa gaarigi uu sadexdii sanee ugu dambeeyey watay. Albaabki dambe ayuu furay boorsadi ayuu ku xooray. Wuxuu usoo dhaqaaqay xagi albaabki darawalka isagoo eegaya saacada. Waa labo iyo tobankii iyo rubi duhurnimo. Waad ka gaareysaa! ayuu isku sheegay Si fiican weliba!.

Telegram@SOMALIBOOKS

Macalin wuxuu usocday Göteborg. Wuxuu usocday arooski ina adeerkii oo berrri subax oo sabti ah gabar loo doonayo. Balse waxaa Macalin la ballamiyey inuu yimaado habeenka jimcaha ah si uu uga qeybqaato kulan ay reerku yeelan doonaan.

Dadka badankiis oo qaraabada ah waxay ku noolaayeen Göteborg, Macalin iyo dhowr kaloo

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

dibedaha ama magaalooyin kale ka imanayay mooyee. Gaarigi ayuu furaha ku rogay. Gacanta ayuu la helay naastaradi gaariga. Hees qaraami ah oo ay dhagahiisu yaqaanaan ayaa soo gaaray *“intaan aamusnaayoo amakaagsanaabuu wakhtiguna ordayee... asalkuba jaceylku intuu ugubka igu yahay....*

Codka gabadha heeseysa wuu xasuustaa inuu yahay codkii Xaliimo Khaliif Magool, balse ninka heesta sida tallaalaaliga ah ula qaadaya ma xasuusto magaciisa. Fanaanka magaciis amuxuu ahaa? Marshadi koowaad buu geliyey, cagta ayuu ku riixay gaaski, marka hadi labaad iyo tii sadexaad ayuu isku bedelay. Rubi saac kadib waxaa u muuqday tabeele uu ku qornaa Göteborg. Wuu gartay inuu Caasimadi k a baxay. Saacad kadibna wuxuu gaarigiisu dhexjeexayay qariirada Sweden. Bishi juun ayaa labo maalin ka dhamaaneysay. Sadex maalmood kadib ayaa loo dabaaldegi doonaa maalinka xorriyada soomaliya. Cadceedu in kastoo aysan saa u kululeyn misna waxay ifineysay dhulkoo idil. Macalin isagoo isteerinka haya ayuu eeganayay dhulka uu sii

Telegram@SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

dhexjeexayo. Waxaa u muuqday doog aanan dhamaad laheyn, kolkuu in socdaba waxaa u muuqanayay goof fardo lagu dhaqdo, goof uu qof ama labo qudha ay dhextaagan yihiin, goof uu katarabiil dhexyaalo. Bad iyo webiyo ayay mararka qaar ishu qabaneysay isagoo buundo dul maraya.

Intuu soo socday Macalin, oo magaciisa runta ah la yiraahdo Axmed, wuxuu ka fekerayay safarkiisa iyo sida uu noqon doono. Dhabtii ma jecleyn inuu aado Göteborg, ma rabin inuu aroos ka qeybqaato. Soomaalida iyo caadooyinkeeda ayuu ogyahay. In lagu foorjeeyn doono, dadka qaarna ay ku canaanan doonaan inuusan weli guursan. Waxay odhan lahaayeen ”Afartan baad jirtaa. Facaa awlaadoodi bey qorsho ugu jiraan inay u guurinayaan, adiguna waad soo taagan tahay” Waxay kula xifaaltami lahaayeen, caruurta Cabdi, walaalkaa kaa yar yaad la korsan kartaa.

Telegram@SOMALIBOOKS

Wuu necbaa kelimada iyo kulamada arooska, wuu necbaa kulamada qaraabada qaar ka mid

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

ah, oo uu niyada ka odhan jiray waa jaahilo. Aalaaba markay qaraabada soo wacaan wuxuu ku marmarsinyoon jiray inuu shaqo kujiro, ama weekendhigaa mashquul yahay oo howl isniinta laga doonayo isku diyaarinayo . Mararka qaar wuxuu u sheegi jiray inuu safar ujoogo magaalo fog oo uu uyimid si uu uga soo qeybgalo konferens. Laakin safarkan ma suuroobin inuu ka dan sheegto. Waayo waxaa lagu jiraa xilli dadka badankiis ay fasax yihiin, bisha juun shaqaalaha iyo ardaydaba waa fasax badankood, teeda kale waxaa guursanayay wiil ina adeerkii ah oo ay isku fiicnaayeen.

Telegram @SOMALIBOOKS

Macalin xilli dheer ayuu keli noolaa. Wuxuu ku noolaa Stockholm cimrigiisa barkiis xilli gaaraya ayuu soomaliya moogan yahay. Markuu dib uleecdo wuxuu isyiraah waxbadan ayaa isbedelay. Berigii uu Sweden yimid isagoo cimrigiisa labaatanka sanad ula jiro wuxuu ku noolaa jaamacada dhexdeeda. Wuxuu la noolaa arday badan oo wadamadoodi waxbarasho looga soo kala kaxeeyey. Arday Shiinees ah, kuwo kooreeyaan ah, kuwo ruush ah, carab,

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

turki iyo afrikaan ayuu daarta la qeybsan jiray. Waxbarashadu afka ingiriisiga ayaa lagu bari jiray. Taa waxay daliil u tahay in xilligaa qorshuhu ahaa in ardaydaanu wadamadoodu u noqon doonaan kolkey jaamacada dhameystaan. Wuxuu weheshan jiray ardaydaa qowmiyadaha badan kasoo kala jeeda oo ay jaamicadu ka dhaxeyso.

Beriigii hore wuu la xiriiri jiray soomaliya balse kolki dambe danta ayaa u diiday. Waraaqo uu boostada dhigay ayaa lagu soo celiyey, marki dambe xafiiski boostada uu bakhshada ka diri jiray aayaa si cad ugu sheegay inaan soomaiya warqad loo diri karin, oo aysan gaarsiin karin bakhshada wadankaas.

Telegram@SOMALIBOOKS

Waxaa xigay in taleefanki uu go'ay. Waxaa xigay in safaarada ka jaratay sideetanki i doolar oo ardayda soomaiyeed la siin jiray. Sabtiyo iyo axado badan ayuu shaqo ka dhigan jiray Macalin inuu taleefan ku helo aabihii oo sheyb ah iyo walaalihiis. Mid isaga ka yar iyo labo kaa waaweeyn. Hooyadood iyagoo yar ayay dhimatay. Markuu nasiib yeesho hallow ayuu

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

maqli jiray intuusan taleefanku isjarin. Berigi dambe wuxuu istusay inaysan macquul aheyn xiriir lala xiriiro somaliya. Dad badan oo soomali ah ayaa berigaas iska soo dhiibay Stockholm, kuwaas ayuu booqan jiray oo uu wadanki ka wareysan jiray.

Waxaa u muuqday tabeele tusaya in wadada howl dhismo ka socoto boqol mitir ka dib. Xawaarihi ayuu qaboojiyey. Qadar yar dabadeed markuu soo dhaafay ragi wadada dhisayay ayuu xawaarihi dheereeyey. In yar kadib ayuu arkay tabeele kale oo ay ku qoran tahay “kusoo dhawoow magaalada Lindköping”, wuxuu daqiiqad kadib isteerinka u weeciyey xaga midig, wuxuu u leexday Göteborg. Saacada baansiinka ayuu isha ku eegay. Wuu igeynayaa ilaa Göteborg ayuu qiyaastay. Heesta raadiyaha ayaa dhagahiisa soo gaarayay…

Telegram@SOMALIBOOKS

asluub badaneyd, amaan badaneey sidi ubixii udgoonbadaneey, waxaan ku oonbixi lahaa anigoo aroos kula gala, adigoo oorideyda noqdoo ubad dhala…

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

oohinta indhaheeyga aan baranin adigeey aawadaa u ilmeeyaanee....Ayaankeygu wa anigoo ku arkoo ,aroor walbaa aan ku eegtaaye...

Niyada ayuu iska tusay dad jaceyl la haraadsan. Codki raadiyaha ayuu yara dalacay. Wuu isku dhoolacadeeyey. Fariinka ayuu cagta aayar usaaray markuu arkay gaari hortiisa socday oo u iljabsaday inuu leexan doono.

”*asluub badaneyd, amaan badaneey...*” ayuu heestii la qaadayay in cabaar ah ilaa uu ka soo gaaro baansiinlaha Alingsås. Oo aan wax badan u jirin caasimadi labaad ee Göteborg. Wuxuu qiyaasay inuusan bansiinka gaariga kujira uusan Göteborg gaarsiin doonin. Baansiinlaha ayuu ku leexday. Markuu baansiinka ku shubtay ayuu yara jimicsaday isagoo gaarigi ag taagan. Xabad jalaato ah oo uu soo iibsaday ayuu qolofti ka qaaday. *DAIM* ayaa ku qorneyd xaashida jalaatada dabooleysay. Afsoomaali ahaan ayuu u akhriyey da’im, ma ebedbaa? Wuxuu soo

Telegram@SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

xasuustaa saaxiibadiisa iswidhishka ah inay kula kaftami jireen in magaciisu, *Malin*, uu magac hableed yahay marka iswiidhen la joogo. Dadku kala duwanaa, alla awoodiisu weynaa, dhab u eeg aduunyada! Qolawalbaa afkeed iyo isirkeed!

Göteborg markii ugu dambeeysay uu Macalin booqdo waxay aheyd sideed sanadood ka hor. Kolkaa oo uu u yimid shir caalami ah oo loo qabanayay aqoonyahanno ka kala imanayay yurub oo idil. Markii markaa ka horeysayna waxay aheyd lix iyo toban sano ka hor. W uxuu kusoo booqday arday soomaali ah oo sidiisoo kale soomaliya waxbarasho looga soo diray . Markaa Macalin sanad baa uga dhimanaa inuu ka qalinjabiyo jaamicada, ardeygaa oo uu soo booqanayayna markaa ayuu xamar ka yimid. Waxaa caado aheyd in ardayda jinsigoodu tahay soomalida ay sidaa isku soo dhaweyn jireen, oo magaalooyin kala fogfog isaga iman jireen. Maanta ayuu isyiri soomaalidu Stockholm wey is garab mareysaa iyagoo xita salaaanta aanan iska qaadin. Wax badan ayaa is bedelay! Ayuu xaqiiqsaday. Ma aha ayuu yiri

Telegram@SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

qaladkooda soomalidaa! Isagoo qiil uyeela arrinka ayuu yiri yaa salaan ku kala gaara soomaalida Stockholm kunool?!!

Markuu qalinjabiyey Macalin waxay aheyd sanad ka hor sanadkii ay dowlada dhexe ee soomaliya ay burburtay. Xaalada nabadeed oo aanan la hubin awgeed ayuu Sweden isku dhiibay, isbuuc kadibna waxaa la siiyey sharci deganaansho. Kuma qaadan bilo badan Macalin inuu shaqo helo. Wuxuu shaqo tababar sanad ah ka helay bangig a SEB, oo uu ushaqeeynayay. Lix bilood markuu tababar ugu joogi ayay siiyeen shaqo abadan ah. Markaa wuxuu kunoolaa Sundbyberg. Da'diida waxay aheyd todobo iyo labaatan, wuxuuna ku hamminayay inuu khibrad shaqo sii helo intuu wadankiisu ka hagaagi doono. D abadeedna ka qeyb qaato dib udhisida wadanka noloshiisa soo dhisay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Wuxuu ku mahdiyey ilaahay nasiibka uu yeeshay. Wadankiisa ayuu u mahadceliyey iyo sida isagoo yar waxbarasho ilaa dugsi heer sare ah soo gaarsiiyey, dabadeedna ka bixiyey

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

kharashka uu dibeda waxbarasho ugu yimaado. Allow wadankeeyga kaalmee! Ayuu ugu duceeyey.

Marar badan ayuu damcay inuu guursado. Balse nin aan dhul laheyn – ayuu istusay – guurkiisu ma fududa! Hadaad dhulkaaga iyo dadkaaga dhex joogto waxaad heli malaayiin gabdhood oo aad kala xulato! Waxaad fudud inaad hesho gabar kula caqli ah, kula dhaqan iyo caado ah, aad isku wax xiiseysaan, isku si xalka u aragtaan, iyo tan ugu muhiimsanee kula khibrad ah! Soomalida maanta joogta Sweden badankeedu khibradaheenu wey kala duwan yihiin ayuu isku sheegay. Tabeele ay ku qoran tahay ”welcome to gothenburg” ayaa jidka dhinaciisa ka muuqday. X awaaraaha uu gaariga ku socdo ayuu eegay. Waa boqol. Wuu yara qaboojiyey markuu arkay tabeelo tusaya in ugu badnaan lagu wadi karo sagaashan.

Telegram @SOMALIBOOKS

Isku khibrad ma nihin gabar dagaal soo aragtay, tahriib wadamo mid iyo labo kasoo talaabtay, gabar soo aragtay wadan la isku amaano dilka iyo boobka, gabar nidaamka

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

wadanka ay timid sawir dhalanteed ah ka aaminsan, isma keeneyno! Ayuu isku sheegay. Wuxuu ka istaagay nalka cas. Miraayada haadka ayuu eegay. Gaari xamuul ah ayaa daba taagan. Tabeelaha ka suran gaariga dushiisa ayuu isyiri sii eeg inta gaarigu taagan yahay. Liseberg uleexo midig ayuu akhriyey, Hisingen u leexo bidix, Centrala Göteborg hore usoco. Heesti socotay ayaa dhegihiisa dhuuxeen...

alla awoodii weynaa, abuurtiisu badanaa, bal u fiirso aadmiga, sida uu u kala duway.... Niyadiisu baa weydiisay su'aal: Yaa yiri qof kula caqli iyo cabir ah keliya ayaa la guursan karaa? Madaxa ayuu ruxay, waddadi Central a Göteborg ayuu qabsaday.

Telegram @SOMALIBOOKS

Toban daqiiqadood kadib wuxuu yimid aqalki reer Yusuf, adeerkii oo ay aabihii ilmo adeer ahaayeen. Gurigaas ayay qaraabadu ku kulmayeen habeenkaa. Habeenkaa oo ahaa habeenka ka horeeya habeenka arooska . Arrimo dhowr ah ayuu adeer Yusuf soo jeediyey inay qaraabadu falanqeyn doonaan haeenkaa.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

iyadoo laga faa'ideysto kulanka arrooska, maadaama aanu dadku is arag intii la rabay. Ayuu adeerkus oo jeediyey.

Habeenkaa jimce marki la casheeyey, ayuu Macalin isi su'aalay; Ma nigaa khaldan, mise dhaqanka iyo caadooyinka soomaalidaa khaldan? Wuxuu karhanayay raga sadexda ah oo barsada sigaarka la taagan. Waxay taagnaayeen meel aanan talaabo u jirin halka uu taagnaa Macalin. Waa ina adeeradii xilli gaaban ku nool sweden. Sigaarka ayay u afuufayeen si xushmad darro ah. Waxaa u wehliyey inay sadexdoodaba isku dhinac hadlayeen. Yaa la dhageysanayaa? Yaa wax sheegaya? Kolkuu in cabaar ah eegayay ayay u cadaatay in sadexdooduba wada hadlayaan isna maqlayaan!

Telegram@SOMALIBOOKS

Wuxuu habeenkaa bartay xeelo ay raga adeegsadaan si isaga loo dhageysto. *Nabigaaga ku Sali*! Ayuu dhahaa kan raba inuu hadalka ka booobo kuwa kale ...intay nabiga xusayaana hadalki ayuu sidaa ku qaadanayaa! Smart!

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Ayuu Macalin oo qunyar socodka caanka ku ahaa uqirtay.

Macalin ma aheyn qof dhaqanka i yo caadooyinka wacan ee soomalida ka faana. Wuxuu ahaa mid iskula weyn isirkiisa iyo soomaalinimadiisa. Wuxuu akhrisan jiray buugaagta afkiisa hooyo ku qoran. Wuxuu dhageysan jiray heesaha afsoomaaliga lagu heeso. Wuxuu xiiseyn jiray xusaska sida maalinta xorriyada oo uu ka qeybqaadan jiray. Balse hadana waxaa dhab ah in wadankii wax badan uu mooganaa.

Telegram@SOMALIBOOKS

Wuxuu cimrigiisa in ka badan bar uu la noolaa ummado kale, wuxuu la shaqeynayay, la noolaa, axdi ganacsi iyo mid kale dhex mari jireen dad dhaqamo kale leh. Saa oo ay tahay wuxuu isxasuusin jiray inuu akhriyo wargeysyada afsoomaaliga ku qoran, dhageysto wararka soomaliya kasoo gaaraya, si uu xaalada guud ula socdo.

Hadana markuu dhex yimaado ragga soomaalida ah wuu ka muuqday inuu ka caado gedisan yahay. Wuu afgaabnaa, hadalkiisa

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

nuxur ayuu lahaa, talaabadiisa xushmad iyo qadarin ayay xambaarsaneyd. Sidiisabana hadal gaabsiga wuu u dhashay.

Wuxuu xasuustaa isagoo fasalka lixaad ee dugsiga hoose dhexe ee dhagaxtuur dhigta, maalin ayaa macalinkiisa kula xifaal tamay inuu qoti yahay. Qoti waxaa la odhan jiray dad jinsiyadaha itoobiya daga ah, oo usoo qaxay Soomaliya, dagaallo iyo abaaro dartood.. Dadkaa alaaba afsoomaaliga wuu ku yaraa, maadaama ay afaf kale lahaayeen. Sidaa oo ay tahay macalinka subaxaa ardayda ku hor canaanaya kama cabsan inuu la doodo. Macalin- ayuu yiri- gabayga waan soo bartay oo diyaar baan u ahaa inaan kasoo baxo saaka, laakin ma fahmin gabayga waxa uu ka hadlayo, ereyada badankoodna af shisheeye ayay iiga dhignaayeen markaan xifdayay, sidaa awgeed ayaan ukala iloobay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Aabihiis Macalin Muxumud allaha u naxarisyee wuxuu dhihi jiray caruurteydoo dhan anigeey i raaceen axmed mooyee! Axmed oo markii dambe aabihiis magaca ka dhaxlay wuxuu

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

aabihiis dhihi jiray wuxuu raacay hooyadiis. Qunyar socodka, afgaabnida, midabka iyo laf yarida intaba.

Macalin markuu reer Yuusuf aqalkooda yimid habeenkaa jimce, wuxuu soo xasuustay aabihiis. Maadaama uu adeerkii Yusuf iyo aabihii ay muuqaalka is shabaheen. Laf weyn ayay lahaayeen, waxay ahaayeen ragga dhererka lagu tilmaamo. Berigii uu Macalin Muxumud yaraa wuxuu ahaa askari ciidanka Asluubta ah. Askarta waxaa lagu qaadan jiray dhererka iyo lafta. Malaha sidaas ayuu aabahey askari u noqday. Ayuu isweeydiiyey.

Telegram@SOMALIBOOKS

Wuxuu kaluu xasuustaa in aabihii askari ahaa, oo mushaharkiisu yaraa. Kuna filleyn inuu ku masruufo hooyadiis iyo walaalihiis. Hooyadii haba lafyaraatee wey karti badneyd. Iyadaa masruufka ka kaalmeyn jirtay aabihii. Iyadoo aanan la aqoon farsamadaa ayay la xiratay ganacsato joodariyaal iyo caleenta shaaha ka keena Kenya. Hooyadiis ayuu xasuustay kartida ay laheyd. Aabihiis mararka qaar waxaa dhici jirtay inay qaaraamada lagu soo

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

qoro ay iyada ka dabarijirtay, Macalin awoowgiis oo baadiyaha ku nool markii abaaro lasoo sheego iyadaa gaari nuskiis oo raashin iyo alaab ah u xawili jirtay. Hooyadiis wey qurux badneyd. Hablaha dunida iyadaa ugu qurxaneyd! Wuu hubay taas. Ehelka xiriirintiisa waxaa u dheera inay deriska xaaladoada la socon jirtay. Hablo badan oo aanan shaqeysan ayay wax siin jirtay. Maadaama ay ragga qaba wax u diidaan hooyadiis ayay wax weydiisan jireen. Qof muslimad ah ayay aheyd hooyadeey. Muslimad qurxanoo karti badan! Dad jaceylka iyo beer nuglida ilaah janada ha kugu geeyo! Ayuu u duceeyey.

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxbarashada uu heerka sare ka gaaray Macalin ma aheyn wax weligiis u fududaa. Macalin wuxuu xasuusanayaa inuu imtixaankii fasalka sideedaad labo mar ku dhacay! Imtixaan weyn ayuu ahaa, oo maalmo todobo ah socday, maadooyin badan la isku imtixaamayay iyo duruus la soo dhigay bilo badan ka hor.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Hooyadiis iyo aabihiis maalintaa uu guriga natiijada imtixaanka la yimid wey ka cadhoodeen. Aabaha wuu hadal kululaa. Hooyada wey dhaantay inkastoo isheedaa ay gubeysay laabtiisa. Aabaha wuxuu ku lahaa ”kan wax faa’ido ah ma keenayo, fuundi iyo xamaali ma ogiyee wax uu ku fiican yahay ma arko” Hooyo hadalkeedu wuu gaabnaa, wuu miisaannaa balse wuu kululaa. Hooyo intaad banooni iyo wax daran ku maqneyd baad casharadaadi gabtay miyaa? Ayay su’aaleysay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Wiil yaroo labo iyo tobanjir ah ayuu ahaa Macalin berigaas. Wuxuu xasuustaa inuu habeeno badan ilinta ku qubi jiray barkinta sariirta. Inuu aayo wacan sugeynin ayuu kii dhalay usheegay. Ilaa uu ka weynaaday Macalin markuu arko Xamaali, iyo gaari gacanle meel baa danqan jirtay. Fuundi guri dhisaya markuu arko ereyadii aabihiis ayuu soo xasuusan jiray.

Sanad kadib, marki ardaydii la fasalka aheyd ay u gudbeen dugsiga sare ayuu Macalin bilaaay inuu kitaab safinusalaat ka akhristo

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

masaajidka xaafada. Berigaa ayay noloshiisu is bedeshay. Sheekha kitaabka akhriya wuxuu u sheegay inaysan fiicneyn in banooni la cayaaro, in habeen wareega xaaraan tahay, in sagareedka dadka caba laga fogaado. Macalin wuxuu xasuustaa sheekhaa maalintuu sidaa kuyiri wixii ka danbeeyey inuu dersinka iskuulka si fiican ula xarbin jiray.

Markuu iskuulka ka yimaado oo qadeeyo ayuu sariirta la kori jiray buugaagtiisa. Hadii gabay la xifdo yahay halkaasuu ku xifdin jiray, ha fahmo ama yuusan fahmine wuu xifdin jiray. Hadii ay tahay xisaab ama seynis halkaasuu qaacidooyinka ku xifdin jiray. Hadii ay tahay soomali iyo kacaan, carabi iyo diin, taariikh iyo joqoraafi casar walbaa ilaa salaada makhrib uu masaajidka ka aado sariirta ayuu ku xifdi jiray duruusta. Makhrib iyo cishaha dhexdoodana kitaabka ayuu raacan jiray.

Telegram@SOMALIBOOKS

Imitixaankii koowaad natiijo fiican ayuu keenay. Natiijo ay macalimiintiisu la yaabeen. Imtixaankii xigay sidoo kale. Markuu dugsiga sare u gudbay oo shaarkii jaalada ahaa ka

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

gudbay Macalin dadaalkiisu isma dhimin. Markuu ka baxayay foomfoorka, fasalka afaraad ee dugsiga sare Macalin wuxuu ku baasay natiijada sadexaad ee iskoolka oo dhan!

Taa ayaa sabab u aheyd inuu galay ardaydi sodomeeyada tiro ahaa oo ay dowladu waxbarasho ugu kala dirtay caalamka. Qaar waxay tageen Italiya, qaar ingiriisiga, Iswiserland, Norway iyo Sweden. Axmed wuxuu yimid Sweden biloowgii sideetameeyadi isag oo ay wehliyaan labo arday oo kale oo soomali ah. Waxaa sadexdoodi lagu kala reebay madaarka Arlanda. Axmed oo Stockholm ku haray mo oyee labadi kale waxaa la kala geeyey Umeå iyo Växjo.

Telegram @SOMALIBOOKS

Axmed wuxuu bartay cilmiga maareynta iyo xisaabaha shantii sanee ugu horeeysay. Waxaa raacay xilli uu isku qoray koorsooyin “Sweden kujoog” ah. Hadii uusan jaamicad dhigan waxaa loo celin lahaa wadankiisa, maadaama uusan waxbarasho u joogin. Dabadeedna markii dowladii soomaliya duntay ayuu qaxo oti ka noqday Sweden.

- - - - - Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

■■■

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

CUTUBKA LABAAD

Subixi sabtida, maalintii aroosku dhacay o Axmed iyo gaarigiisu waxay ahaayeen tagsi aanan istaagin. Siduu aroorti ugasoo toosay aqalka reer Yusuf wuxuu ka dhaxeeyey madaarka, tareenka, dukaamada raashinka, xaafad iyo xaafad kale. Intaa waxaa la lahaa hebel meeshaa kasoo qaad, iyo heblaayo halkaa kadoon, meeshaa kala soo adeeg gabar, odey hebel iyo rag la socda aqalkoodi kasoo qaad oo aqalka arooska keen. Inta badan waxaa hore usaarnaa wiilka aroosaya maanta walaashii oo magaalada kala tagaanay. Dhowr jeer ayuu raashin kala soo adeegay gabdho lagu daray. Gabdhaha mid waxay aheyd wiilka aroosaya walaashii oo axmed ay ilmo adeero ahaayeen, iyo labo gabdhood oo gabadha la aroosaya ay is xigeen.

Telegram@SOMALIBOOKS

Intey jidka ku jireen axmed wuxuu dareemayay inuusan sheekadooda la socon! Waxay ka sheekeysanayeen dad ay wada garanayaan, iyo mararka qaar waxyaalo uusan xiiseyn. Sida

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

wararki ugu danbeeyey ee amison iyo sheekh shariif, ama sharciga iswiidhen oo la xiray, iyagoo sheegaya sababo aanan madaxiisa geli karin. Waxay lahaayeen waxaa sharciga loo xiray xisbi cunsuri ah ayaa baarlamanka soo galay oo wuxuu yiri waa in la joojiyaa dadkan madmadoow oo muslinka ah sharciga la siinayo.... Axmed dhegihiisa waxyaalahaasu waxay la ahaayeen sidii tii la odhan jiray berigii uu yaraa qori ismaris baa nin safar ah waddada ku helay.. oo intuu qoryo lasoo baxay oo ismariyey ayuu ninkii noqday dhurwaa....

Telegram @SOMALIBOOKS

Inta kaleexo iyo xaafada heblaayaan sii mareynaa ayay wargelinayeen isagoo isteerinka haya. Mararka qaar heeso soomali ah ayuu u gelinayay oo hadalkaa yaraan jiray.

Mar ayaa dhegihiisu waxaa soo gaaray Mulki oo uusan markaa magaceeda aqoon, laakiin gadaal ka baran doono. Waxay hablaha kale u sheegeysay in dukaan cusub oo soomali leedahay Göteborg laga furay. Dukaan lagu iibiyo buugaagta afsoomaliga, aflaanta

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

soomaaliga ah, lagana dalbado inay aroosyada u duubaan filimada.

- Muxuyadiin arooskiisa caawa ma la duubayaa? Ayuu weydiyey

- Haa dabcan! Ayay ina adeertii Abyan kasoo hormartay gabadhii kale.

Wuxuu Axmed qiyaastay isagoo xaflada arooska dhex taagan. Oo hareeradiisu yihiin dad lebis wacan ku lebisan, xaflwad iyo sanbuusiga la isla dhexsocdo, hablaha iyo ragu indhaha iskala hadlayaan. Isagoo gaarigi darawalinaya ayuu isweeydiiyey dharka uu caawa ku lebi san doono, shaar cad iyo hurdi inta u dhaxeeysa ah ayuu ku arkay muraayad uu istusay inuu hor taagan yahay, surweel madoow, timaha isagoo gacanta ku simaya iyo wuxuu arkay isagoo shaarka garbaha ka masaxaya. Wuxuu kusoo toosay isagoo la leeyahay la leexo bidixda...wuxuu eegay tabeele uu ku qornaa Gamlesta´n, marsho hoose ayuu geliyey isagoo farisiyoonaha ku taagan, wuxuu gaarigi u weeciyey wadadi bidix oo ka talaalmatay tii

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

weyneyd oo uu ku socday tobanki daqiiqee ugu dambeeyey.

Kolki ay gurigi yimaadeen ayuu gabdhihi ka caawiyey inuu adeegii la dejiyo. Aqalki ay u hore u gudbay. Rag fadhiya ayuu u tagay. Saxan beer ah iyo roodhi ayaa loo keenay. Galaas vimto ahna waa loosoo raaciyey. Ragi kale waxay yiraahdeen inaga hortaa baan wax cunnay. Markuu caloosha buuxiyey ayaa waxaa u baaqay adeerkii Yusuf, sidi inuu isaga sugayay

Telegram @SOMALIBOOKS

- Wiilkeygi axmadoow! Ayuu hadal uga bilaabay markuu qolka kale la yimid, sidaad u timidba fursad baan kugu doondoonayay ma ogtahay?

- Maxaa dhacay adeer?

- War nin yahow waan kuu yaabanaa! M aalin dhexdaas ah yaan waxaan booqday reer Göteborg nagula nool. Axmadow ma i rumeysaneysaa adeeroow, hadaan ku iraahdo kolki albaabki la iga furay maalintaas qofka koowaad oo niyadeyda kusoo dhaay waa adiga!

- Maxaa dhacay adeer?

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Anigoo aanan sanad iyo ka badan ku arag ayaad niyadeyda kusoo dhacday maalinkaas. Waxaan soo booqo islahaa odey anaga ah, oo dhawaan magaalada soo degay. Markaan albaabki garaacay axmadoow yaa waxa albaabki iga furay gabar yar oo sidii fardihi laf ilaah siiyey, midabkana aad dahab moodo, afkuna khad. Anoo yaaban oo la yaaban gabadha ayaan odeygii weydiiyey. Wuxuu iisheegay inay gabadhiisa tahay. Markaas ayaad niyadeyda kusoo dhacday axmadoow. Waxaan iri kii aad adeerka u aheyd maanta nasiibkiisu waa xaadir! Ninki si fiican yaan magaalada ugu soo dhaweeyey isaga iyo xaaskiisaba. Aniga iyo eedadaa Seynab, ayaa isaga iyo xaaskiisa la xiranay, xaafada ayaan keenay, marti sharaf heer sare sideedi ayaan usoo dhaweynay. Saa dan baan leenahaye! Ayuu yiri odey Yusuf oo Axmed garabka ka dharbaaxaya....Intaa adigaan niyada kugu hayee ogow wiilkeygiyoow!

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxaad tahay ninkan sidaa mutacalimka u ah, oo shaqada heerka sare ah heysta, ilaah wuu kuu nimceeyey, midda kaliya oo kaa maqan

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

waa gabar. Waxaana rabaa inaan gabadhaa kusoo tuso intaadan naga noqon ee maxaad ka qabtaa.

- Adeer waad mahadsantahay horta. Gabarna faras u ekaanshaheeda waxyaalo ka muhiimsan ayaa jira. Dadku waa kala dookh!.

- Waan ogahay...ayuu adeerki hadalki ka dhexgalay Axmed...gabadh guurkeeda waxaa laga eegaa dhowrsanaanteeda, akhlaaqdeeda, kartida, quruxda iyo reerka ay ka dhalatay....intaba gabadhan imtixaanka wey ku baastay ayuu adeerki ka balanqaaday Axmed isagoo u qoslaya oo garkana heysta.

Telegram@SOMALIBOOKS

Axmed oo diidan sida uu adeerki garkiisa gacanta ugu hayo sidi caruur caano la siinayo ayaa gacanti iska fujiyey.

- Adeer hadalka igama aadan sugin...waan hubaa gabar fiican inay tahay, wiil fiican ilaah ha siiyo, aniguna adoo raali ah aniga gabar ii doon miyaan ku iri?

- Sidaa ha odhan! Sidaa ha odhan adeer...Anigu waalidkaa baan ahay.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Waalidkuna wax wey u dooni karaan caruurtooda, iisheeg hadaadan aheyn wiilkeyga.

Axmed oo aanan weli jawaabin ayaa waxaa qolka soo furay gabar uu dhalay oday Yuusuf oo Axmed raadineysay. Axmed waa lagu sugaa hee! Ayay kutiri oo ilinki usoo laabtay markey aragtay inuu aabaheed kula jirto qolka.

- I dhageyso , I dhageyso ayuu hadalkii sii watay odey Yusuf isagoo markan jilibka A xmed gacantu u saaran tahay.... Waxaa la yiri nin kaa weyn kaa waayo aragsan...aniga aabahaa ayaan labo gu' ka weynahay...adeerkaa ku jecel baan ahay, wiilkeygi baad tahay...hadaad cimrigan soo gaartay oo weli aad doob tahay, dabcan xil baan isi saaray inaan wixi kaa maqnaa kuu doono. Hadaad leedahay tu aanan farac iyo isir aanan wadaagin baan keeni doonaa... aniga kulama jecli... Waxaanka cabsanayaa...sidaan dhaqankaaga iyo cimrigaaga ka arko inaad naag gaaalo ah soo wadidi.... waxay soomalidu tiraah "gabadhii hooyadeed haruurka tuntaa iyadana

Telegram@SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

haadinteey taqaan" Naag gaalo ah ma maqli karo, ma fahantay?

- Axmed oo aanan hadalka wada fahmin ayaa adeerkii usheegay "nin weyn baan ahay" qolkina wuu kasoo baxay isagoo leh Abyan ayaa isugeysa oo aan meel u qaadi doonaa, howl baan maanta kujiraa.

Abyan ayaa ka codsatay inuu gabar lasoo adeegtay uu gurigeeda uqaado. Gabadha oo magaceeda iskugu sheegtay in la yiraahdo Mulki ayuu usoo qaaday xaafadeedi. Labadooda keli ah ayaa gaariga saaran. Daqiiqadihi ho re wey kala aamusnaayeen. Axmed waxaa niyadiisa weli ka qeylinayay ereyadii adeerkii Yusuf...adigoo cimrigaan ah...afartan maxaa iidheer? Ayuu isweeydiiyey. Muxuu Adeer iiga dhigay odey sideetan jir ah?

Telegram@SOMALIBOOKS

Hees ayaa gaariga ka dhex shidan oo ay gabadhu mooday inuu ku mashquulsan yahay dhageysigeeda...codkii Hibo nuura ayaa dhagahooda oo gaarayay..

Neecaaw, barwaaqiyo naq iyo doog...nimciyo reys inagoo ku wada nool... oo noqono qeyrkood

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

kuwa ugu nasiib roon nasiib badan....reerkii lagu nastee lagu nagaadee...wadajiree nabadgala alahayow inaga yeel...

- Noloshu hadii ay sidi heesaha ahaan laheyd! Ayay tiri iyadoo rajeyneysa inuu hadalka la qabto

- Maxaad tiri? Ayuu soo maahsaday

- Heesta kuu shidan ayaan la yaabay macaankeeda. Waayahan lama maqlo wiil soomali ah oo heesaha soomaliga ah dhageysta! Ayay uga warantay khibradeeda...heeso jameykaan iyo wax daran ah ayaa ushidan garigaad raacdo! Ayay uga warantay kuwey hore usoo aragtay.

Telegram @SOMALIBOOKS

- Anigaba waan dhagetsaa heesha amerikanka ah! Ayuu u sheegay laakiin heesaha soomaaliga ah sidey iigalaan iima galaan kuwa kale.

- Waa runtaa! Ayay tiri iyadoo isha ku eegeysa. Wuxuu eegayay hortiisa, waxay saarnaayeen wado waasic ah, balse gawaari badan ay buuxiyeen, garkiisu wuu xiiran yahay, timahiisa wey gaaban yihiin, shaarkiisa

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

midabka buluug biyadka. Waa shaar ga cmo- gaab ah. Iyadoo surweelkiisa jeanska ah ku maqan yey booday kolkey mooday inuu gacanta xageeda lasoo aaday.

Marshadii dhexdooda aheyd ayuu gacanta lasoo laacay. Waxay aragtay seedaha iyo murqaha gacantiisa oo fidaya. Marshadi sadexaad ayuu geliyey, gaaski ayuu ku istaagay, gawaaridii hortooda socotay ayaa kala yaraaday. Wadadi baa faaruqday. Marshadi afaradaa iyo tii shanaad ayuu labo seken dhexdood isku bedelay.

Telegram@SOMALIBOOKS

- Stockholm ka waran? Soomali badan maa degen?

- Ka badan inta Göteborg ku nool! Ayuu u sheegay isagoo markan soo eegay wejigeeda, maadaama waddadu firaaqo tahay.

- Maba la iskeen barrine, aniga Mulki ayaa la iyiraah. Abyan saaxiibteed ayaan ahay.

- Oo caawa dadka buranburayaad ku jirta miyaa? Ayuu kula xifaaltamay

- Dabcan! Anigaaba tiriyee buraanburkee

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- Waan iska qiyaasay ayuu yiri, hadaayay waxaan ku maqlaayay adigoo gabdhaha usheegaya in dukaan laga furay Göteborg, oo lagu iibiyo aflaanta iyo suugaanta sooomaliga ah.

- Oo sheekada waad la socotay miyaa? Ayay tiri sidi tuug la qabtay

- Maya dhagaheygeey kusoo dhacday sheekadu...teeda kale suugaanta aad baan uxiiseeyaa. Runtii macalin ayaan mar ahaa intaanan soomaliya kasoo tagin.

Telegram @SOMALIBOOKS

- Goormey aheyd?

- Labaatan iyo labo sanadood ka hor

- kkkkkkkkkk ma igu cayaaree? Labaatan iyo labo sano aniga shan sano baan jirayee? Adna macalin maad aheyd?

- Anigana todobo iyo toban baan jiray oo fasalki afaraad oo dugsiga sare baan kujiray. Marki macalinka soomaliga iyo suugaanta la waayo, ama kan taariikhda iyo joqraafiga ayuu maamuluhu iweydiin jiray inaan ardayda casharka siiyo.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- Meeqo sano ayaad iswiidhen joogtay?

- Afar sano ayay ujawaabtay

- Afka iswiidheshka ah ma baratay?

- Waxoogaa... ayay jawaabtay misna sidi inay doneyso inay u warrato soo eegtay.

<hadalki ayuu ka sugay>

-.. afarta sanadood oo aan joogay sanad bas baan iskool tagay! Ayay uga warrantay xaaladeeda. Anigoo uur leh baan imid sweden, wiil baa isoo guursaday oo iga soo dalbaday anigoo itoobiya jooga. Markaan imid sanadki hore uurbaan lahaa oo iskuul ma tagi n, sanadki xigayna umul baan ahaa, kii sadexaad iyo afaraadna buuq iyo dagaal baan ku noolaa

Telegram@SOMALIBOOKS

- Maxa adhacay acuudu bilaahiye

- Madaxeyga isii baanku iri isna wuu diidanaa.

- Waanka xumahay! Ayuu yiri Axmed isaga aoo aanan usii daakhulin arimaheeda khaas u ah. Waa caado uu hooyadiis ka dhaxlay. Ma daakhili jirin arrimaha qofka khaaska u ah, inuu ka dhageystana ma jecleyn. Ninkaaga iyo

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

adiga maxaad isku dagaasheen? Miyaa ruux kusoo hortaagan la odhankaraa? Ayuu maalin dambe isweeydiiyey, isagoo isku canaananaya maxaad u ogaan weyday in la qabo iyo in la furay horta?

Habeenkaa xafladi arooska ayay mar labaad isku arkeen Mulki iyo Axmed. Salaan ka dib ayay Mulki hablo la taagnaa bartay wiilkan Stockholm arooska uga yimid. Macalin soomaali iyo suugaanta ayuu soomaaliya ku ahaa! Ayay kula xifaaltan tay dadki oo hor tuban.

Telegram@SOMALIBOOKS

- Buraanburka ay buraanbureyso anigaa u toosiyey ereyada ayuu isna ku xifaaltan celiyey isagoo gacanta utaagaya hablihi midood.

Axmed inta badan habeenkaa wuxuu garab taagnaa wiilasha adeerkiis Yusuf oo kala da'a ahaa. Wey ku adkeyd inuu dhex galo martida arooska iskugu yimid. Martidu waxay u badnaayeen dad isyaqaana. Waxaa mararka qaar looga yeerayay kushiinka si ay saxamo xalwo ah iyo daasado cabitaan ah martida u

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

gaarsiiyaan. Mararka qaar wuxuu u baxayay dibeda si uu hawo macaan usoo qaato. Isagoo aaryo soo doontay ayuu dareemay Mulki oo garabka ka taabaneysa. Haye qoob-ka-cayaarka ma jeclid miyaa adiga?

- Qof iweydiiyaa ayaan la'aa! Ayuu ku yiri

Nakeen ayay tiri iyadoo gacanta heysa. Waxay u waday masrixi ay ka heesayeen koox magac adag lahaa oo reer Göteborg ah. Afsoomali ayay ku heesayeen laakiin muusikada mooyee wax murti ah ma sheegeynin.

Telegram @SOMALIBOOKS

Gacantiisa bidix ayuu dhexdeeda l a helay. Dhexdu inay dhuuban tahay ayuu dareemay. gacanteeda midig ayay garabkiisa bidix saaratay. Labo gacmoodee haray ayay faraha is qabsadeen. Qudh yar kadibna farihi is galeen. Yaa bilaabay? Cidna ma oga. Farahooda ayaa is dhexgalay sidii timo tidcan. Labadooda jir wuu isku dhawaa laakin isma taabaneynin, inuu kolkol isku dhaco mooyee. Sidii martida kale ayay isla jaanqaadayeen. Marmar ayay

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

indhahoodu isku dhacayeen intii horee ay kala aamusnaayeen.

- Stockholm maxaad ka qabataa?

- Waxaan u shaqeeyaa bangi shacabweynta lacagtooda u maalgelisa! Oo layiraahdo advanza. Weligaa ma maqashay advanza?

- Maya

- Hadaad lacag heysatid lacagtaada waxaad kusoo shuban kartaa bangiga aan ushaqeeyo, dabadeedna, waxaan kuu maalgelineynaa wixii aad jeceshahay, sidi dahabka, sida aqalada, beeraha, baansiinka iwm. Hadaad doonto lacagta waan kaaga maalgelineynaa suuqyada yurub, kuwa afrika, japan, barazil iyo meel walboo aad na tiraaho inaan ku gelino lacagtaada.

Telegram@SOMALIBOOKS

- Xaas iyo caruur ma leedahay? Ayay weydiisay iyadoo aad moodo inay waxkale ogow isleedahay aanan aheyn camalkiisa

- Maya, weligeey ma guursan

- Garoob maa tahay?

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- kkkk nin garoob ma noqdaa?

- Maxaad uguursan weysay?

Ma waxay fileysaa inuu yidhaaho, tu ii qalanta ayaan waayay, oo ay markaa tiraah tu anoo kale ah kawaran? Mise sidi adeer Yusuf ayay la yaaban tahay ninkan cimrigan ah oo weli doobka ah? Axmed wuxuu isweydiinayay sidey u aragto jawaabtiisa.

- Guurku waa Calaf! Ayuu kuyiri

- Miyaa? Ayay tiri iyadoo aanan u inuu imtixaanka ku baasy iyo inkale.

Telegram @SOMALIBOOKS

Iyagoo isku dhegen oo goobtii cayaarta taagan ayaa waxaa soo ag istaagay sadex wiil oo ay Mulki is garanayeen. Gacanta ayay u taagtay iyadoo Axmed ku dhegen. Mid baa salaanti ka qaaday oo gacanteedii soo jiitay, kuwii kalaa axmed dhinac istaagay oo cayaarti ka dhig ay mid ay dadkoo dhan ka dhaxeyso. Dhowr qofoo kale ayaa kusoo biiray. Wareeg sidi garangar ah ayey sameysteen. Axmed sadexdii wiil ayay dantu baday inuu la jaanqaado. Marba mid baa

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

isku bedelayay inuu dhexda galo oo cayaar boodo.

Fursad kale ayuu dhowr goor isku dayay Axmed inuu Mulki keli la noqdo, oo ay isbartaan. Kuma guuleeysan. Maadaama uu ka mid ahaa dad fara ku tiris ah oo gawaari watay waa loo baahnaa. Marba koox dad ah ayaa la lahaa gee xaafadoodi.

Doorkii ugu dambeeyey oo ay saacadu tahay sadexdii arooryaad ayuu kusoo noqday goobtii aroosku ka dhacayay. Waxaa joogay dad aad u tiro yar. Ilmo adeeradii oo sadex ah, dhowr hablood oo gabadha la aroosayo ay qaraabo ahaayeen, iyo asxaab reer Göteborg ah ayaa goobti nadiifinayay, sujaayadihii laalaabayay, fiilooyinkii ka qaadayay masraxa, qasacadihii cabitaanka laga cabay iyo saxamadi xalwada ayay bacyaal madmadoow ku kal a asturayeen. Howshi ayuu dhinac ka galay. Waxaa u muuqday inay Mulki weli joogto! Wuu farxay. Inay karti badan tahay ayuu isku sheegay. Saaka arooyadii ayuu suuqa raashinka geeyey,

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

saakana sadexdii subax ayay dhexdu u xirantahay oo saxaarado qashin ah ka la meeleyneysaa. Indhahooda ayaa isku dhacay. Weli majoogtaa? Waan ku faraxsanahay inaad joogtid! Ayuu midba midka kale uurka uga sheegay.

Wuxuu uurka ka jeclaa inuu caawa aqalkeeda isaga uu u qaado. Hadana wuu ogaa inay jiraan gawaari kale oo diyaar ah. Howshi ayuu halki ka waday. Saxaarado waaweeyn oo ay fanaanintu wateen ayuu gaarigoodi ula qaaday, markuu kasoo noqday ayuu muuqaalkeedi waayay. Mulki aaway! Ayuu damcay inuu qeyliyo. Balse ma yeelin ee labo bac oo waaweeyn ayuu meeshii qashinka u qaaday. Ina adeertii Abyan, Mulki saaxibadeed, ayaa dhinac socota. Waxba ma weydiin.

Telegram@SOMALIBOOKS

Markey Abyan u timid isagoo kushiinki ka qaadaya qasacado cabitaan ka buuxaan ayuu gartay inay Mulki mid kale ka raacday.

- Aniga iyo adigaa harnay ayay tiri. Baakadaasna soo qaad xalwo ayaa ka buuxdee.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- Yaa qaaday Mulki? Ayuu isweydiiyey

■■■

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

CUTUBKA SADEXAAD

Subixi axada, habeenki arooska ka dib waxaa la soo toosay dadka oo wada caajisan, tabar daran. Duhurkii martidi ku hartay aqalka reer yusuf waxaa loo sameeyey qado. Raga qolka fadhiga isku buurtay dan iyo camal toona kama dhicin. Xaaji Yusuf ayaa ugu da' weynaa, wiilkiisa labaatan jirka ah ayaana ugu yaraa. Rag qaraabo ah iyo saaxiibadood ayaa qolka joogay. Salaadi duhur iyo qadadi ayaa la isla sugayay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Martida joogta badankeeduna safar ayay ahaayeen qadada kadib. Intii qadadu karay say ayuu wiil ka mid ahaa wiilasha Yusuf, Axmedna ay ilmo adeer ahayeen kombuyuutarka ka tusay filin majaajilo ah. Filinkaa gaaban waxaa loogu magac daray "sida loo shukansado gabadha mutacalimada ah" wuxuu ku baxayay afsoomaali.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Ninka jilaya wuxuu sheegay inay gabadha mutacalimada ahi tahay mid yasta dadka soomalida ah. Sidaa darteed si aad u hanato laabteeda waa inaad adiguna yastaa dadka soomalida ah. Hadal waxaad uga bilaawda- ayuu yiri - anigu hilibka ma cuno ee waxaan ahay caleencune! Wey kuu bogi doo ntaa! Ayuu dhageystayaashiisa ka ballanqaaday. Hadii ay arinka soomaalida kula soo qaadi wayso bal adiga ku soo qaad oo dheh: Soomalidu waa dad reer baadiya ah, dib usocda, waayaha jira aanan la jaanqaadin! Iyadaa ku dhameystiri doontaa geeraarkaa...ayuu dhageystayaashiisa ka ballanqaaday.

Telegram @SOMALIBOOKS

Ragii Axmed la fadhiyey baa ku qoslay...cajaladi kolkii ay is demisay ayaa waxaa ku xigay filin kaloo gaaban oo leh ”sida loo shukaansado gabadha wadaada ah”

Garka waa inaad la baxdaa! Ayuu yiri shuruuda koowaad, magacaaga iyo kan aabahaaba hadii aad awoodo u bedel magacyo dhagaheeda qanciya sida ”abuu cubeyda” ,

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

”abuu suufiyaan”, ”abuu Mushtahqaan” iyo magacyo ceynkaa ah, Shuruuda sadexaad wuxuu yiri waa inaad, marka sanduuq lasoo dhexdhigo raga tukaday, waa inaad diyar u ahaataa oo aad horey usoo sarifatay lacag shan shan ama toban toban ah, si ay wax badan ugu ekaato. Tus raga inaad sadaqada jeceshahay. Markaad magac ka dhex sameysato wadaada magaalada. Gabadha u cid dirso oo ”first date” la qaado. Waa inaad maalinkaa diy aan ahaataa! Ayuu hoosta ka xariiqay...waa inaad soo xifidaa xadiisyada iyo aayadaha aakhiro ka sheekeynaya, guurka wanaagiisana ka hadlaya... Wuxuu ku dhameystiray markaad guursatid dibeda ha ukaxeysan gabar wadaad ah! Wadaad dibeda kuuguma ahaaneysee...

Telegram @SOMALIBOOKS

Wixii meesha fadhiyey ayaa wada qoslay.... Odey Yusuf ayaa yiri Axmed waa cashar fiican oo adiga laguu dhigayo. Naagaaha maanta jira shukaansigoodu ma sahlana! Ayuu odeyga u diggay Axmed. Isagoo soo xasuusinaya inuu arrinku inta ka sahlanaa beriguu wiilka ahaa . Haduu ii hadalka adeerkiis dhageystana uu isaga mid sahlan u hayo.

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Axmed oo hoosta ka gubanaya ayaa adeerkii ku yiri. Aniga naag afrika kama soo iibsana ayo, ee mid aan axdi kalsooni, jaceyl, wadatashi ku dhisan aan yeelano ayaan helayaa.

- Aaway hee?! Ayuu yiri odey yusuf..waad sugeysaa...wakhti wax la sugo maad joogtaa? Ayuu su'aal kusoo celiyey.

- Waan u wada joognaa! Ayuu si xushmad leh adeerkii ugu jawaabay.

Telegram @SOMALIBOOKS

- Adeer lama sugo, loo joogana lama yidhaahee talaabo iyo ficil buu guur u baahan yahay. Sugaa wuu seegaa! Ayuu ugu maahmaahay. Sadex nin eebe wuu awoodaa laakiin waxba ma siiyo ...ayuu odey Yusuf wiilka uu adeerka u yahay waaniyey... sadex nin..*ilaahayoow guursan maayee hay gablaminin!* Ilaah wuu awoodaa laakin kaama yeelo!, *ilaahayoow xoogsan maayee xoolo isii*...laguma siinayo...*ilaahayoow camal wacan falan maayee hay cadaabin!* Ilaah wuu karaa laakiin kuma siiyo.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Intaa uu adeerkuu ”ilaahayoow” daa hayo Axmed uurka ayuu ilaahayoowda hayaa..ilaahayoow yaa meesha iga saara, maxaa Göteborg ikeenay….

Marar badan ayaa sidaa loogu gafay, mararbadan iyo goobo badan ayaa sidaa loogu aflagaadeyey Axmed, oo la yiri maxaad lasoo taagan tahay oo aad sidi facaa reer udhisan weyday. Maalintaase hadalku meel nabar ah ayuu danqiyey.

Telegram @SOMALIBOOKS

Casarkeedi ayuu hadalkii la yiri gogosha ka kiciyey. Wuxuu kushiinka ugu tagay ina adeertii Abyan. Keligeed ayay kala nadiidineysay maacuun raga qolkooda laga keenay. Ilaah arooski wuu soo gabgabeeyey, martidi ugu danbeeysay ayaa boorsooyinkoodu xirnaayeen. Waa galab axad ah bishuna juun. Waa xilli lagu jiro xilligii kuleylaha. Inkastoo aad casar moodo hadana saacadu waa

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

todobadii habeenimo. Abyan waxay ina adeerkeed Axmed ka codsatay inuu labadoo berii oo kale iska joogo, oo uu shaqada fasax kasoo qaato, waayo ayay tiri Göteborg ma aadan kala arag. Habeenkaad timid sidaad howsha arooska u gashay ayaad weli taagan tahay.

- Waad mahadsan tahay abaayo laakin berri waa isniin oo kulan baan la leeyahay rukun muhiim ah! Ayuu runti uga warramay, iyo inuusan ka baajin karin kulankaa. Wuxuu uga waramay inuu Göteborg ka helay intuu joogay, howsha uu ku jirayna howl laga filayo ay tahay oo uu walaalkii arooskiisa ka shaqeynayay.

Telegram @SOMALIBOOKS

- Marar badan ayaan Göteborg imid laakin tookadan sidaan uga helay weli ugama aanan helin! Ayuu uga warramay dareenkiisa.

- Maxay sidaa ku noqotay! Ayay weydiisay iyadoo biyaha raacinaysa saxan ay oomo hore ugu dhaqday.

- Walaahi ma ogi laakiin dareen aanan caadi aheyn iyo far´xad saa'id ah ayaan dareemayaa.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Waan hubaa ayuu yiri inaan dhawaan soo noqon doono.

- Wax miyaa jira? Ayay tiri iyadoo si u eegeysa una dhoolacadeeyneysa.

- Wax maxay ah! Ayuu dafiray waxay ku tuhuntay

- Ma ogtahay? Ayay tiri in soomalida yurub isku guursata tobankiiba lix ka mid ah ay aroos isku barteen markii koowaad!

Telegram @SOMALIBOOKS

- Ma adaa baaritaankaas sameeyey?

- Maya laakiin waxaan kuu cabirayaa inuu arrinkaasu dhab yahay.

- Maya waxba ma jiraan! Ayuu u dhoolacadeeyey misna.

Laakiin saacadihii ugu danbeeyey Axmed wuxuu dareemayay dareen xasilooni, degenaan, niyad qanacsan iyo rajo fiican. Maxaa ku beeray dareenkaas! Mulki? Waxaa la yiri *dhedhenshaa waalan*...Wuxuu dareemayay inuu Mulki dhedhemiyey wuxuuna doonayay

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

inuu wax intaa ka badan ka ogaado. Wuxuu rabay inuu barto. Ogaado qisada nolosheeda. Maalintii uu gaariga ku waday oo uu usii waday xaafadeeda ayuu dareemay inay wax jiraan. In dhexdooda ay wax ka beermeen. Laakiin hadana ma hubo, oo habeenkii arooska ayuu islahaa xaafadeeda u qaad oo fursad kale u hel si aad u barato. Taasina macquul ma noqon. Ma Stockholm buu galabtan axada ah iskaga caraabaa? Ma iloobaa sidii uu kuwo horeba u iloobay? Ma nin diracah buu iska dhigaa siduu adeerkiiba ku guubaabiyey inuu iska dhigo?

Telegram @SOMALIBOOKS

- Ma hubtaa ineysan waxba jirin? Ayay Abyan oo aanan rabin inay sii dhibto ina adeerkeed tiri.

- Haa..Sidaan u hubo inaan aniga iyo adiga ilmo adeer nahay! Laakiin ayuu yiri – dad badan oo xiiso leh ayaan isbaranay. Gabadhii aad igu dartay shalay oo aad itiri xaafadeeda sii gee…ma xasuusto magaceedee….ayuu inkaray Mulki….ma si fiican baad isku taqaaniin?

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- Tee ka wadaa? Ayay su'al kucelisay iyadoo soo xasuusineysa inay dad badan ku dartay inuu xaafadooda geeyo.

- Waa gabar afsoomali waaweeyn ku hadleysa! Masar cagaar biyood ah iyo shuko madoow ayay ku lebisneeyd, midabkeedu wuu furnaa..

- Mulki maa sheegee? gabadhi maalinkaan soo adeegeynay nala socotay. Oo aan kadiba ku iri xaafadeeda sii eege, habeenki arooska galabtii ka horeysay?

Telegram @SOMALIBOOKS

- Haa

- Mulki aboowe waa la qabaa! Wiil yar ayay leedahay.

Mulki macluumaad badan ayay usheegtay Axmed, sida inay caruur mid ah leedahay, inay afar sanadood sweden joogtay, Innin Sweden keenay, in itoobiya ay ku noolan jirtay. Inay ninki isku kaceen sanado gaaban kadib markey Sweden joogto. Laakin uma sheegin in la qabo! Rajadii uu u lahaa yaa sidi buufin cirbad ku dhacday u naaqustay. Maxay beenta i igu sheegtay?

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- Ma hubtaa? Ayuu ina adeertii Abyan weydiiyey isagoo indhihiisu dhakafaar ka muuqdaan.

- Aboowe, waa sheeko dheer laakiin Mulki in la qabo anigaa kuu huba, ninkeeda Muuse aa la dhahaa xaafada ayuu nala degenaa, mardhow ayuu Malmö u guuray. Waa wiil maskiin ah oo reer buuloxaawo ah. Iyadoo umul ah ayay isku kaceen, dad badan oo uu aabe ka mid yahay ayaa dhex galay sheekadooda, laakiin wey ka diiday. Intaan ogahayna weli ma uusan furin.

Telegram@SOMALIBOOKS

Balaayo! Naag soomaali! Ayuu isciilay inuusan fahmin dhaqankooda. Maxay heenta ii gu sheegtay? Naagaha soomaalida shukaansikooda wuu ogaa inay ku adkeyd. Ma fahmi karin caadooyin badan. Shukaansiga dumarka ajnabiga ayaa wax badan ka fudud! Ayuu isyiri

Dadku wuu isbedelaa haduu bulsho wax badan moogan yahay, sidoo kale luqada ruuxa in badan wadankiisa moogan wey is bedeshaa. Wuxuu la yaabnaa erey uu habeen dhexdaas

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

ah ka maqlay tv;ga afsoomaliga ku baxa oo uu adeerkiis la fiirsanayay. Dad ayaa waxay ka *barakaceen* ayuu maqlay wariyihi oo akhrinaya warkii...Macnaha wuu fahmay A xmed laakiin wuxuu xasuustaa beriguu soomaliya kasoo tagayay lama dhihi jirin dadbaa *barakacay* ee waxaa la odhan jiray dad baa *meel ka qaxay*....Wuxuu is barbar dhigay labada erey "barakacay" iyo "qaxay" dabcan macnaha wuu qiyaasi karay laakiin afkiisa weligii kama soo baxeen ereyga haduu isaga warka akhrinayo habeenkaa.

Telegram @SOMALIBOOKS

Gabar soomaaliyeedna dabcan waxay u baahan tahay af ay fahmeyso iyo dareen ay dareemi karto in lagu soo jiito. Wuxuu isku ciilay inuusan isbedelka wadanka uu waxbadan mooganaa! Tv;ga afsoomaliga ku baxo sanadkii ayuu mar maqli jiray, markaana wuxuu la joogaa reer soomaali ah oo uu dan ka soo yeeshay ama soo booqday. Wargeys afsomali ah oo ay ku qoran tahay "SOMALITIMES" wuu ku arkay laakin ma akhristo... Dad badan oo soomali ah lama socdo. Dadka uu la shaqeeyo ama uu la socdo waxay u badan yihiin ajnabi.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Shukaansiga hablaha Swedishka ah ama sweden ku noolaa xilli dheer wey u fudu deyd. Wuu ogaa. Wuu yaqaanay xeeladaha iyo hadalada lagu soo jiito. Laakiin ma rabin inuu kuwaa guri la dhiso. Wuxuu soo xasuustaa xeeladii ugu horeysay uu gabar ku shukaansado. Wuxuu ahaa sadex iyo labaatan jir. Gabar ay isku iskuul ahaayeen ayay ishiisu qabatay dhowr goor. Maalintii dambe ayuu daba galay iyadoo usii socota halka baska laga raaco. Markuu boosteejada lasoo istaagay ayuu salaamay, inyar kadib ayuu cirka eegay oo yiri...nasiibxumiyaa..waxaad moodaa in roob soo socdo...Maxaa dhacay ayay tiri oo aad la nasiibxuntahay? Dhar baan dhaqdoo banaanka ayay iigu warnaayeen. Ayuu kuyiri. Yacni halkaa wuxuu ku tusayaa gabadha inuusan aheyn sida wiilasha la da'da ah ee wuxuu tusayaa inuu guri keligi degen yahay oo aqalkisa isaga maamusho. Keligaa miyaad degen tahay? Ayay kutiri iyadoo fahansan arrinka...haa ayuu yiri..sheekadiina halka uga sii waday. Fiidadka qabowga ah intaanan

Telegram@SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

kalaabka la aadin aqalkiisa ayay iman jirtay, maadaama uu keli degenaa.

Mulki xeeladeedu intaa wey ka adag tahay! Ciil ayuu is baday. Hadaan tv;ga somaliga la soc on lahaa, hadaan SOMALITIMES akhrisan lahaa xeelado badan, iyo caqliga guud ee bulshada aan ka dhashaay sow maanan garteen caawa.

Axmed qorshihiisu wuxuu ahaa inuu Abyan weydiisto taleefanka Mulki, oo intuusan Stockholm usafrin tijaabo sameeyo. Laakiin markii loosheegay sida xaalku yahay wuu ka khanaasay. Wuxuu iska dhaadiciyey inuu ka khanaasay.

Telegram@SOMALIBOOKS

- Stockholm ayaa xalwada laga cunaa tookada dambe sow maaha? Ayay Abyan si dadban ula xifaaltantay ina adeerkeed axmed, in arooskan kan xiga uu kiisa yahay.

Dadka soomalida ah aroos maahee wax kale maa yaqaanaan miyaa? Ayuu karhay su'aasha. Guurku waa calaf! Calafkeygana ma ogi kolkuu iman doono oo uurkubaale maahiyee! Ayuu usheegay.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- Waa runtaa.

Sideedii iyo rubi fiidnimo, cadceeda markey gaabatay, dhulkuna weli if yahay ayuu Axmed boorsadiisi ku tuuray gaarigi uu watay. Albaabki darawalka ayuu soo dhinac istaagay. Ina adeertii Abyan iyo caruur uu adeer uyahay ayuu u gacan haatiyey. Furihi ayuu ku rogay gaarigi. Gaaska ayuu cagta wada saaray. Wuxuu kasoo baxay xaafadii Bergsjön, inyar kadib wuxuu soo dhexmaray Kortedala iyo Gamlestad intuusan korin waddadi weyneyd oo u socotay Stockholm.

Telegram@SOMALIBOOKS

Safarkiisi ayuu qiimeeyey. Wuxuu ku faraxsanaa labadaa beri oo uu Göteborg joogay inuu nafta wax ka maqnaa helay. Dad saa u badan meel mar kulama kulmo intuu Stockholm joogo. Dad soomali ah oo intaa tiro la eg, aroos iyo reyreyn iyo farxad iskugu yimid waxay u aheyd wax ay naftiisu ku faraxdo.

Noloshiisa caadiga ah Axmed waxay ku ekeyd shaqada oo uu galo sideeda arooryaad shan maalmood todobaadkiiba. Wuxuu ka soo rawixi

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

jiray shanta galabnimo. Fiidkii wuxuu la qaadan jiray asxaabtiisa iskugu jirta jinsiyadaha badan. Mar ay baar fadhiistaan, mar ay jirka dhisaan ama kubad cayaaraan, mar uu saaxiib aqalkiisa ku booqdo oo ay turub ama cayaaro kale halka ku cayaaraan.

Sanadkii mar ama labo ayuu aadi jiray safar. Wadamo u uqorax doonto iyo damashaad ayuu booqan jiray, todobaad ama labo ayuu maqnaan jiray. Wuxuu booqday Spain, Italy, Greece, Brazil safaradii ugu danbeeyey. Maadaama uu xilli dheer nolol ceynkaa ah ku noolaa waxay sababtay inuu dhaqanka soomaaliga ka gaabiyo. Oo ileyn dhaqanka iyo caadadu wuu isbeddelaa, hadii aadan ku dhex nooleyna wax badan baad gafeysaa. OO ileyn Qaxi haduu noqday barakac! Axmed wax badan ayuu gafay! Shar iyo kheyrba!

Telegram @SOMALIBOOKS

Wuxuu ku faraxsanaa inuu bartay Mulki. Waxay ula ekeyd gabar bashaash ah, furfuran oo karti leh, inta waxaa dheeraa inuu muuqaalkeeda soo jiitay. Wuxuu soo xasuustay dibnaheeda khadda ahaa iyo ilkaheedi sidi

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

suufki u cadaa hadana simanaa. Afkeeda balaadhan ayaa indhosarcaad uga dhigay dhoolacadeeynteeda. Jirkeeda kale ma arag laakiin wuu hubay, markuu dhererkeeda ka cabir qaatay, inay aheyd gabar qurxoon.

Marshadi shanaad ayuu geliyey gaarigi, wuxuu gudbay Norrby tabeele ay ku qorneyd. Gaaska uu cagta ku hayo mooyee lugtiisa bidix wey u nasaneysay. Isteerinka uma baahneyn in wax saa ah la maamulo. Wado dheer oo waasic ah ayuu kusocday. Heesti shidneyd oo uu markii hore iska maqlaayay ayuu markan dhageystay...*qandhaa isoo haayseee, aan la qashuucayee...qaanso roobaadaan kugu qiyaasaayee*...ayuu lahaa codka gabadha heeseysa. Madaxa ayuu iska taabtay, misn a dhafoorada sidi dhakhtar eegaya inay qandho heyso..Maya madaxu wuu qaboow yahay...Ma qandhana.

Telegram@SOMALIBOOKS

Waa la qabaa! Ayuu maqlay codkii Abyan ina adeertii.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Weligii ma damceen naag la qabo! Wuu ogaa waa inay ka dhigan tahay isagoo dumiya kacbada. Anshax daridaa malaha, akhlaaqda lagu soo barbaariyeyna uma ogola inuu qaado talaabo ceynkaa ah.

Wuxuu isweeydiiyey hablihi kaloo uu arooska ku arkay. Wuxuu markii ugu horeeyey dareemay cidlo. Wuxuu dareemay inuu yahay "outsider" waa ereyga uu niyadiisa soo qabatee. Wuxuu dareemay inuu yahay "kelisocde". Labadaa berri oo uu ku dhex jiray dadkaa badan oo la jinsiga ah, rag iyo dumar, caruur iyo ciroole wuxuu dareensanaa mid aanan sheekadooda la qabsan karin.

Telegram@SOMALIBOOKS

Mararka qaar markey wada qoslaan dadku wuxuu isweydiianay ma waxaasaa "funy" ah, ama maadd leh? Mararka qaarna keligii ayaa qoslayay inta kale oo aamusan. Ma aha inuusan afka soomaliga aqoonin? Maya Afsoomaliga aad ayuu ugu fiicnaa weliba wuxuu ku hadlayay afsoomali "waaweeyn" oo murti iyo maadba leh. Laakin wuxuu ahaa afsoomaligi sideetameeyadii soomaliya looga

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

hadli jiray, xifaaltankii berigaa ayuu yaqaanay. Sidoo kale maadaama uu suugaanta soomaaliga ah aad u xiiseyn jriey wuxuu yaqaanay miro heeso iyo gabayo badan. Laakin dhibkiisu wuxuu ahaa inuusan la jaan qaadi karin dadka la jinsiga ah oo dhawaan iswiidhen yimid. Labo arin dartood.

Mid waa dadkaasu waxay ku kaftmayaan waayahay jira iyo khibradooda ay wadaagaan. Khibradaa oo ay ka dhaxleen waayaha ay isla soo mareen, ama tahriibki ama dagaaladii ama wadamadii la soo maray... Dhexdooda ayaa iskugu dacaayadeyn jiray kaas/taas waa “taytaanig” taa oo ay ula jeedaan waa ruux soo tahriibay oo ay dooni kula qalibmatay badaha italiya iyo liibiya u dhaxeysa, dabadeedna kusoo guuleeystay inuu yurub soo galo markii badda laga soo badbaadiyey. Kaasi waa “teytaanig” waxay aheyd xifaaltankii uu kala tagay Göteborg.

Telegram @SOMALIBOOKS

Kow iyo tobankii iyo bar ayuu soo galay Stockholm dhulkoo habeen ah. Gaarigi ayuu ayuu dul istaajiyey xariiqmihii dhulka ku

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

yaalay oo tilmaamayay inuu isaga leeyahay booskaas Nr 53. Isagoo boorsada garabka ku wata ayuu wiishki koray oo riixay Nr 3, dabaqa sadexaad, halkaa oo uu ku yaalay gurigiisa. Gurigiisa wuxuu ka koobnaa labo qol oo mid jiif yahay midna fadhi, kushiin weyn iyo suuli iyo barando qolka fadhiga ka baxda oo uu mararka qaar cabitaanka la fadhiisto. Markuu soo galay gurigiisi boorsadi ayuu meel ku xooray. Taleefanki ayuu beegsaday si uu udhegeysto akhbaarta ay u reebeen dadka soo wacay intuu maqnaa. Sidaa caado ayay u aheyd. Markuu shaqada ka yimaado tal eefanka ayuu ka bilaabi jiray inuu akhbaarta ka dhegeysto..

Telegram @SOMALIBOOKS

Wuxuu riixay badhan. Waxaa dhawaaqay taleefanki oo wargeliyey akhbaarti ay u dhaafeen dadki soo wacay intuu maqnaa.

- *Waa lagu salamaay Waa Mulki. Gabadhi aad isku barateen Göteborg daraato. Waxaan nambarkaaga kasoo helay saaxiibteey Abyan*.....aamusnaan ayaa raacday..isagoo yaaban hadana mooda in akhbaartu ay inta ku

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

egtahay ayuu maqlay… *waxaan rabay inaan ku salaamo keliya.. waa ku kaas... hadii aad dooneyso inaad isoo wacdo taleefankeyga waa...031- 43 33 88*

■■■

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Eedadeed Raaqiya ayaa soo korsotay. Hooyadeed Markey dhimatay iyadoo yar waxaa Mulki loo geeyey eedadeed Raaqiya oo soo korsatay. Aabaheed wuxuu dib uguursaday sanado kadib. Wiilal labo ahaa oo Mulki ladhashay waxay lanoolaayeen aabahood iyo aayadood oo uu aabahood soo guursaday markey Mulki hooyadeed mootan tabay shan sanadood.

Eedada waxay laheyd caruur shan ah oo kuligood ka da' weynaa Mulki. Ragna wada ahaa. Mulki waxay noqotay gabadhii yareyd oo ay Raaqiya dhaqaaleyn jirtay. Markey Itoobiya usoo qaxeen Mulki waxay da'deedu aheyd sagaal iyo toban jir. Afar sanadood ayay ku nooleyd Adis ilaa uu Muuse kasoo guursaday oo viso Sweden ah u xareeyey. Waxay ahayd maalin weyn maalintaa ay safaarada Sweden ee Adis ay tagsiga u wada qaateen. Waxay uga dhigneyd maalin ka qaalisan maalintii arooskeedu dhacay.

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Intay joogtay Adis Mulki waxay casaradii af ingiriisiga ka dhigan jirtay safaarada Australia ee Adis. Sida dhalinyar badanoo soomali ah uu dagaalku u saameyey ayuu dagaalku nolosha Mulkina u saameyey. Heerkeeda waxbarasho aad buu uhooseeyey. Dugsi qur'aan ah oo ay dhowr suurad ka xifiday ayay dhigatay. Dabadeedna iskuul biribaati ah oo hoose dhexe ah ayay lix sanadood ku jirtay. Markey Itoobiya timid iyadaa qalqaalsatay inay ka qeybqaadato casharada safaarada Australia ay bixiso casaradii. Dhalinta la fasalka ah waxay u badnaayeen itoobiyaan, balse Mulki waxay maalin u raacday iskuulka gabadh sudan u dhalatay oo af ingiriiska halkaa ka baran jirtay. Mulki iyadoo faraha iyo dhowr ereyo o ingiriis-suuq ah oo ku hadleysa ayay macalinki safaaada ka dhaadhicisay inuu u ogolaado inay casharada wax ka qaadato. Macalinka oo ahaa nin da'yar wuxuu galabtaaba ku qoray fasal.

Telegram @SOMALIBOOKS

Wiilal badan ayaa damcay Mulki intay Adis joogtay. Qaarbay u muuqdeen naasaha gantaalka la moodo oo jirkeedu soo tufay si uu u mujiyo inay baaluqday. Qaar la inkaaray baa

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

jidadka ku faduuliyey marar badan, kuwo ganacsato ah ayaa eedadeed lacag u ballanqaaday balse ay ku ceyrisay. Wey ogeyd Mulki inay qurxan tahay, wey ogeyd inay tahay habeen dhalad ah, hillaac iyo hawo rageed. Saa oo ay tahay wax badan ayay isweeydiin jirtay calafkeeda iyo key reerka la dhisi doonto.

Labo iyo tobankii dissember ayuu Muuse kasoo dagay madaarka Adis. Intuusan iman waxaa xiriir dhex maray isaga iyo eedo Raaqiyo oo habaryar ugu aadaneyd. Danta Göteborg ka keentayna waxay aheyd inuu la aqalgalo gabadha loo ammaanay. Akhlaaqdeeda, asturnaanteeda, anshaxa iyo da'deeda yar ayaa loogu sheegay inay guur u qalanto . Intaa waxaa dheeraa sawirka ay boostada u soo dhigtay kolki taleefanka ay ku sheekeysteen. Sawir uu inbadan eegay oo iyiri, anigoo kunool Göteborg oo ay ku noolyihiin boqolaal kun oo hablo ah ayaan caawana u oomanahay tan!

Muuse wuxuu ku socday jidka caadooyinka soomalida. Hadii sodon da'du soo gaarto waa inuu ninku reer leeyahay sida faciis. Waa inuu

Telegram@SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

wax doonddoonaa si kastoo ay noloshiisu u egtahayba. Muuse wuxuu ahaa shaqo la'aan tobanki sanadood uu iswiidhen kunoolaa. Xilliyo gaaban oo bilo ah ayay dowladu ku khasabtay inuu ka shaqeeyo shaqooy in uusan isagu xiiseynin. Laakiin gabarbaa beri tiri nin wa tolkiis! Naagna ninkeed!. Muuse wuxuu lahaa qaraabo badan oo kula nool Sweden. Walaalkiis oo kun doolar ingiriiska ka soo diray mooyee lacagta uu ku arooray badankeeda waxaa u uruiyey qaraabada Göteborg.

Telegram @SOMALIBOOKS

Labo iyo labaatankii bishi desember ayuu la aqal galay Mulki. Hotel Hilton ayay eedo Raaqiya u kireysay wiilka ay habaryarta ugu aadaneyd iyo gabadha ay soo korsatay aroooskooda. Marti sharaf, qaraabo, asxaab iyo kuwo calafdoon ahaa ayaa ka qoob cayaaray arooska. Wiilal iyo gabar soomali ku heesya ayaa ka tumay. Mulki habeenkaa waxay u ekeyd ina boqor, timaheeda wey ka muuqdeen in saacado badan lagu howlanaa, cilaanka usaaran wuxuu sharaxayay gacmaheeda faraha ilaa garbaha. Wejiga waxaa loogu soo dhayay subag dubai laga keenay. Dadka sida goonida

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

ah u eegayay caruusada waxaa ka mid ahaa sawirqaadaha arooska loo soo kireeyey, oo kasocday Shareero films. Marba doc ayuu kasoo marayay oo sekenkaa ebed ka dhigayay. Sekenkaa sida xaaladu tahay ayuu ebed uga dhigayay kamerada garabka usaaran. Marba haduu sawir ka reebo xaalada, sow ebed ma noqon?

Mulki waajibkeeda habeenkaa wey gudatay. Caruuski ayay la istaagtay oo jaanta la qaaday. Afka ayay ugu riday cad doolsho ah, gacmaha iyo suxuladeeda ayay garbihiisa saaratay oo isku dhiibtay Muuse, iyadoo ay ka marqaati kacayaan boqolaakii martida ahaa ee arroska kasoo qeybgalay. Muuse oo sidii aar lax ritay isla weyn ayaa hareeraha eegayay si uu utuso martida inuu aar yahay. Caawa muusikadu isaga ayay u shidan tahay. Gabadha dhinac fadhidaa cajabisay. Caawey naftiisu gaartay damac kaamil ah. Wuxuu hubay in damaciisa uu Göteborg kala yimid caawa uga ciilbaxayo sariirta hotel Hilton. Martida iyo qabanqaabada arooska ayuu ku qanacsanaa waxbadan, wejigiisa ayaa farxadi ka muuqatay. Waa

Telegram@SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

inaynu ciidnaa ayuu nafta u sheegay. Waa inaynu ciidnaa caawa!

Sida boqolaal ama kumaan soomali ah oo uga soo horeeyey Adis, Mulki iyo Muuse waxay ballan la qabsadeen safaarada Sweden ee Adis. Maalin isniin ah ayay tagsi u qaateen safaarada. Roob ayaa da'ay, dhulka dhooqadiisa iyo wasakhda ay Adis caanka ku tahay ayay isyiraahdeen tagsiga uga baxsada. Sow uma qalanto in tagsi lagu qaado tan cajabisay! Tan sidi ubax deyr baxay ugu carafta, tan uu in badan u oomanaa. Tan uu rajeynayo inuu tuso asxaabtiisa Göteborg. Isagoo isla qolof weyn sidi aarki ayuu tagsigii kasoo degay. Shaqalihi safaarada ayuu baray in gabadhu uu gacanta heysto ay tahay xaaskiisa! My wife! Ayuu afkiisu soo qabtay! My wife!

telegram@SOMALIBOOKS

Intuusan Adis ka dhoofin Muuse wuxuu Mulki u celiyey aqalki ay intuusan isagu iman ay ku nooleyd. Eedadeed Raaqiya ayuu aqalkeedi ku celiyey. Kol hadii uu viisihi u xareeyey waajibkiisi wuu gutay.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Habeenkii iskugu danbeeysay Adis aad ayuu ula dardaarmay. Wuxuu yiri ma jecli in hadalkaaga isoo gaaro anigoo Göteborg jooga. Socodkaadu ha yaraado. Gabar la qabo iska dhig, ilana soo xiriir hadii noloshaada wax iska bedelaan! Ayuu sadex cashar u jeediyey. Dhawaan ayay visadu kuusoo bixi doontaaye.

Intey Adis joogtay khilaafyo badan ayaa dhex maray iyagoo kala fog. Khilafkii koowaad wuxuu dhacay markii Mulki aabaheed geeriyooday. Waxaa loogu soo sheegay Adis in aabaheed oo sakaraad ah uu yaalo Cisbitaal kuyaala Haregeysa. Mulki waxay markiiba lasoo hadashay ninkeeda Muuse oo Göteborg jooga. Muuse wuxuu usheegay in naf waliba markii looqoray ay dhimaneyso. Safarkeeda ay leedahay aabaan rabaa inaan nolosha ku gaarana inaysan la qumaneyn.

Telegram @SOMALIBOOKS

Sadex isbuuc kadib waxay kala soo hadashay Haregysa iyadoo dultaagan aaskii aabaheed. Waxay u sheegtay inaysan naf kusoo gaarin, laakin nafteedu maanta kaga qanacsan tahay

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

hadii ay Adis iska joogi laheyd. Muuse oo careysan ayaa labo boqol oo dolar Dahabshiil u dhigay.

Khilaafkii labaad wuxuu ka dhacay markuu Muuse usoo jeediyey inay iskaga baxdo iskuulka ay af ingriisiga ka barato. Wey ka baxday iyadoo ka xun.

Khilaafki sadexaad Sweden ayuu ka dhacay kolkii ay ogaatay inuusan Muuse aheyn ninkuu isku baray inuu yahay. Wuxuu isku baray inuu ahaa badmaax! Wuxuu usheegay inuu ushaqeeyo markab weyn oo la yiraahdo Stena-Line oo isku goosha yurub oo dhan. Markii ay weydiisay wuu ku dafiray. Wuxuu ku yiri aniga kuma dhihine waxaa markabkaas ka shaqeeya nin aan asxaab nahay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Mulki waxay madaarka Landvetter kasoo degtay bishi oktoobar iyadoo lasii galayo xilligii qaboobaha. Taa uma fududeyn nolosheeda iyo sawirka koowaad oo ay Sweden ay ka heshay markey timid. Caleemaha dhirta oo daadatay, hawada oo uu qabow cabudhay iyo waxaa soo

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

dhaweeyey cir daboolan,midan danbas ahna leh.

Waxay subax arooyaad yimaadeen aqalka uu u dhigay oo kuyaalay xaafada Bergsjön. Labo maqsin ayuu gurigu ka koobnaa. Qol jiif ah iyo mid barsad ah. Waxaa wehliyey musqul iyo kushiin. Alaabta loo dhigay wey cusbeyd laakiin farsamada nolosha ayay ku qanci weysay beryihii hore. Wiishka loo soo koro aqalka oo ay ka baqi jirtay inuu ku xirmo. Istaaga raashinka lagu karinayo ayay dhibsan jirtay, barsada lawada fadhiyo misna tv;ga lagu sii wada jeedo ayay karhi jirtay. Waxoo dhan waxay la aheyd duni qalafsan.

Telegram@SOMALIBOOKS

Isbuucii koowaad waxaa aqalka sii socoday oo soo socday marti. Qaar soo dhaweeynayay gabadha uusoo guursaday Muuse Gabeyre . Qaar ay ka aheyd bal soo eega sidey u egtahay gabadha la keenay. Martida qaar rag bey ahaayeen oo waxaa casumay Muuse, si uu u tuso jaandheerta uusoo guursaday. Sidii caruur loo waqlalayo ayay martidu keenayeen

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

hadiyado kala duwan. Habalahaba ha u bataan kuwa hadiyadaha wadee.

Isbuucyadii raacay waxay Mulki la derestay cidlo iyo ciqaab. Muuse barqadii siduu u baxo wuxuu mararka qaar iman jiray saqdhexe habeenkii. Mulki oo farsamada nolosha guriga ay dhib ku aheyd aad ayay ugu baahneyd inuu seygeeda wehliyo. Marxallada ay ku sugan tahay ayay saluugtay. Maalin baa taleefan soo dhacay. Weysoo qaaday oo eegtay. Hellow! Ayay tiri iyadoo aanan riixin badhanki la riixi lahaa. Wey eegtay taleefankii. Wey garan we yday si looga jawaabo. Meeshey kasoo qaaday ayay taleefanki iska dhigtay.

Telegram@SOMALIBOOKS

Raashinkii uu yiri waan kuusoo adeegay wax walboo aad u baahan tahay kushiinkey yaalaan. Markii ay rabtay inay raashin ukariso waxay kala garan weysay raashinki. Wixii ay taqaanay ayay ka weysay kushiinka. Kursi ayay salka saaratay iyadoo dhakafaarsan. Misna soo istaagtay oo roodhi iyo kaluun toono is marsatay. Markey saacado badan kadib

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

taleefanka ku heshay ayuu Muuse guriga ugu yimid.

Wuxuu u kala sharaxay intuu ku dhaamay. Tan ayuu yiri intuu bac kor usoo qaaday waa xawaaji kala nooc ah oo isku qasan. Xawaaji ayaa ku qoran! Ayuu ku canaantay sidi inay fahmeyso. Baakadan hadii aad furto waxaa ku jira subag dhegan. Caanaha baakadan ayay kuugu jiraan. Waxaanna waa yaanyo miiran oo cuntada dusha looga shubto, midabkeeda cas ayaad ka garan kartaa.

Telegram @SOMALIBOOKS

Armaajo kale oo weyn ayuu furay. Gacantiisa ayay isha la raaceysay. Sokor ayaa ku jirta baakadan, baakad kale oo la eg tii sokorti ayuu usoo qaaday oo usheegay inay daqiiq ku jirto. Kushiinki wixii yaalay ayuu tusay kuwo ay qiyaasi kartay iyo kuwo kale intaba.

Wey ka xishooneysay isbuucyo badan. Waxay ahaayeen caruus iyo casuurad isku cusub. Wuxuu galo iyo wuxuu guddo ayay laheyd waad baran doontaa dhawaan. Sidaa oo ay tahay hadana waxay saluugeysay marxallada cusub oo ay ku sugan tahay.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Casarkii dambe isagoo sii baxaya ayay gacanta qabatay oo usheegtay inay caawa u baahan tahay inuu la joogo. Madaxa ayaa i xanuunaya ee ha igu cidleeyn aqalka caawa. ayay ku tiri. Wuxuu u ballanqaaday inay rag sugayaan, laakiin uu soo dhaqsan doono. Sidii uu balanqaday ayuu yeelay. Sideedii fiidnimo wuu yimid. Casho kadib ayay wada fadhiisteen barsadii. Waxay uga warrantay waxyaalo badan oo ay niyada ku heysay. Waxay tiri wiilal walaalahey ah ayaa Hargeysa ku dhiban oo ila soo hadlay. Wax ma heysaa aan u dirno?

Telegram @SOMALIBOOKS

Noloshooda waxay aheyd markaa cadhiidhi xag dhaqaale. Muuse wax shaqo ah ma heynin, iyadana waa guri joogto. Lacagta ceyrta mooyee meel kaloo dakhli kasoo galo ma jirin.

Walaahi wey fiicnaan laheyd inaan kaalmeyno walaalahaa laakiin wakhtigan xaadirka ah inagey na heysataa! Ayuu si degen ugu sheegay markii hore. Markii ereyo la isdhaafsadeyna degenaantii dagaal ayuu isku bedelay. Aflagaado iyo sheegasho ayaa la isl a dhacay sidi ul daran.

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- Sidaan u imid weli waan aradanahay! Ayay Mulki sheegatay.

- Sidaad u timid sigaarkaan saaxiibadey ka baryaa! Buu Muusana sheegtay.

- Hadaad isoo guursatay xaq baan kugu leeyahay! Ayay soo xasuusisay xaqa ay ku leedahay

- Xaaskeyga aan xaqa ku qabaad tahay inaad i kaalmeyso mooyee kuuma banaanana inaad idhibto! Ayuu isna soo xasuusiyey xuquuqda uu isba ku leeyahay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Xaalada dhaqaale oo ay markaa noloshoodu ku sugan tahay ayaa aheyd mid aysan labadooduba fahansanayn. Midkoodna khalad ma laha, Midkoodna laguma eedi karo inu usan xaqiisi kasoo bixin. Laakiin hadana baahida oo badan ayaa khilaafka keenay. Baahida oo badan iyo dakhliga oo yaraa yaa isku diray.

Sida reero badan reerahoodu ku burbureenba Muuse iyo Mulki habeenkaa reerkooda dhaawac baa gaadhay.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Aragtidooda ayaa kala duwan. Khilaafka iyo ereyada kulul oo ay isdhaafsadeen waxaa sabab u ahaa aragtidooda oo marar badan kala duwaneyd. Mulki waa gabar Soomaliya markaa ka timid oo aaminsan in dhulka ay timid ay ku dhaqan yihiin. Hadii la dhaqan yahayna sida caadada muslimka iyo soomalidu tahay waa in la saacidaa kuwa kaa itaalka daran. Wey ku saxsan tahay. Muusena wuxuu wax badan ku noolaa dhaqan shisheeye kaa oo uu aaminsan yahay reerkaaga deeqsii hadii wax soo haraanna sokeeyaha kooda daran wax ka sii. Isna wuu saxsan yahay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Hadana baahida ayaa ka weyneyd dakhliga! Saa uma fahminee wey isku duuleen. Markii hadal la is dhaafsadayna dareenki baa kacay oo sheegasho iyo aflagaado ayay qiil ka dooneen. Ruux dareenkiisu kacsan yahayna caqligiisu kaamil ma ahan. Iyadoo la isku xanaaqsan yahay ayay sariirta tageen habeenkaa. Labada dhinac ayay u kala jeesteen.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Barqadii intuusan aqalka ka bixin waxay u sameysay roodhi iyo ukun shiilan iyo galaas caano ah. Koob shaah ahna wey usoo dhinac dhigtay. Iyada quraacdeeda kushiinka ayay l a fadhiisatay. Isaguna qolka fadhiga. Markuu cuntadiisi cunay, tv;ga iyo akhbaartana akhristay ayuu ka tagay.

Nin saaxiibkiis ah ayuu arrinki kala tashaday Muuse. Saaxibkiis oo ka naxay arrinka ayaa kuyiri war waa inteey cusubtahay ee ha u jixinjixin. Naag hadday ku dhahdo gacantaa ixanuuneysa ee ii duug, hadaad ka yeesho berri waxay ku leedahay cidiyaha iga jar. Maxaa xal ah? Xalku waxa weeye horta daawa aqalkeyga soo seexo, ha ku tabto, ha kuu xiisto. Ma fahantay? Labo sadex maalin kadib aqalkaagi tag. Waad arki doontaa iyadoo oori edeb leh ah ayaad u tegi doontaa. Anigaa usoo joogay ee iyeel! Ayuu saaxibkii soo jeediyey.

Telegram @SOMALIBOOKS

Muuse taleefanki gacanta ayuu wada bakhtiyey sidii uu saaxiibkii kula taliyey. Aqalki saaxiibkiis ayuu habeenkaa ujiif doontay. Intuu sariirta joogay habeenkaa dhowr goor

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

ayay kusoo dhacday inuu lebisto oo aqalkiisi iska aado. Laakiin wuxuu is xasuusiyey taladi saaxiibkii ilaa uu ka gam'ay.

Mulki sidii habeeno badan oo hore dhacdayba intuusan iman ayay seexatay. Saqdi dhexe mar ay xanuun lasoo toostay waxay aragtay inuu maqan yahay. Wuu cadheysnaa markuu baxayay ayay isku sheegtay. Suuliga ayay gashay iyadoo caloosha gacanta ku heysa. Wax aad xinjiro moodo ayay aragtay. Iyadoo argagaxsan ayay muraayada hor istaagtay. Ma uurka labada bil ah ayaa soo dilmay? Maadaama ay ugub aheyd arrinku wuxuu ku beeray niyadjab iyo welwel. Sariirti ayay kusoo noqotay. Saacad markey sariirta joogto ayay gama'day.

Telegram @SOMALIBOOKS

Subaxaa markey soo toostay ayay argagax lasoo toostay markey ogaatay Muuse, wiilki Adis ka soo guursaday, caruurta ay uurkiiisa leedahay aabahood, inuu xalay soo dibbeday.

Yey u qeylisaa? Taleefankii ayay qabsatay oo walaalaheed iyo eedadeed Raaqiyo saacado la sheekeysaneysey. Iyaguna waxay la soo

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

hadleen Muuse qaraabadiisa oo Göteborg ku noolaa. Arrinki wuxuu noqday mid faraha Muuse iyo Mulki ka baxay! Wuxuu noqday arrin qaraabada u taala.

Waxaa la yiri digsi kariyayaal badan ay wada walaaqayaan maraq fiican lagama shubto. Qaraabadu wey badnaayeen, rag iyo dumar ayaa arinki u fadhiistay. Meeshi xal laga filayay fadhigii koowaad arrinku wuxuu noqday in Mulki gurigeedi laga raro. Waxay la degtay gabar la qabo oo Muuse qaraabo ahaayeen.

Telegram@SOMALIBOOKS

Fadhigi xigay waxaa arrinki kusoo biiray qaraabo denmark iyo norway ku nool. Kuwaa taleefanka kaga soo hadlay Adis iy o Australia. Gabadhi waxay taagan tahay ninka ha la iga furo! Isna wuxuu leeyahay waa edeb darro naag la qabo oo aqal kale ku hoyaneysa. Naag madax adag aad soo guursatay! Ayay qaraabadu qaar dhegta ugu sheegeen Muuse. Midaan oo kale weligey ma arag!

Mulki iyadaa iskeed usoo noqotay muddo bil ah kadib. Gabadhi ay la degeneyd ayaa safar ku aadeysay Itoobiya, waxay markaa ka xishootay

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

inay la sii joogto gabadha ninkeeda oo caruurtiisa looga tagay.

Muuse oo cadheysan ayay kusoo noqotay. Gelin markey la joogtay ayuu isagoo cadho ka muuqato qolka jiifka ugu yimid goor ay casar liiq tahay. Waxay joogtay sariirta. Keli ayay qol mugdi ah ku fekereysay. Maxey ka fekereysaa?

Wuxuu gacanta ku waday bakhshad iyo waraaqo badan.

Telegram @SOMALIBOOKS

- Fiiri! Ayuu yiri sidi inay akhrin karto iswiidhishka! Fiiri waxaad ku hadashay? Ma waxaad islaheyd wuu kufuri doonaayee taleefanka ka qarxi? Fiiri..sadex kun oo taleefan ah weligey ma arag ruux ku hadlay bil gudaheed!

- Walaaloow horta ha icaaynin. Marka labaadna taleefanka waan ku hadlay w aa run. Maxaad sameeyaa markaad guriga igu xirtay oo aad iga dhaqaaqday…ayay iyadoo sariirti dulfadhida afkii furatay… Iyadoo ooyneysa…Maxaan sameeyaa? Ma inaan waasho ayaad iigu talagashay? Bishaasna waa run inaan taleefanka aad ugu hadlay, anigoo

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

cadheysan yaan walaalaheey iyo eedadeey kala hadlay Adis iyo Hargeysa. Maxaan yeelaa markaad soo dhaxdo, waxba ma ogid walaaloow. Ma ogtahay habeenkaa aad soo dhaxday wixi dhacay? Dhiig xinjiro ah yaa iga yimid, musqushaan saacad fadhiyey, anigoo welwelsan oo walbahaarku igu gubayo ayaan saacad miraayada hortaagnaa? Maxaan ka cabsanayay? Inaan awlaadaada caloosha iigu jira uusan naga dhiman ayaan u welwelsanaa! Waad iska baxday, masruuf ima aadan siinin. Wax kusoo gala iyo wax kaa baxa lama socdo! Maxaan yeelaa? Ayay iyadoo ilmadu indhaha ka burqanayso usheegtay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Muxuu ka ogaa xaalkeeda? Ma dareemay nabarka ay uga warrameyso? Dareenkeeda ay ka warrameyso ma dareemay?

- Waa runtaa waxyaalo badan oo khalad ah ayaan sameeyey, intaad igama maqneydna waan ka fekeray, wax badana wey isbedeli doonaan! Ayuu ka ballaqaaday, laakiin sadex kun oo taleefan ah inteen ka keenaa? Ayuu warqadi eegay. Korontadi, biyihi, raashinki,

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

kaarki tareenka, kiradi wax walboo kale ayaa isugaya inaan bixiyo. Qolka ayuu uga soo baxay iyagoo aanan arrinki isla meel dhigin.

Barandadi ayuu kursi fadhiistay, baakad sigaar ah ayuu jeebka kala soo baxay, xabad ayuu bushimaha ku qabtay. Dab ayuu sigaarki ku qabtay. Qaac ayuu afuufay sidi ruux waxbadan soo ordayay oo istaagay oo jilbaha gacmaha saartay ayuu kursigii dhabarka ku xajiyey oo qiiqi afuufay. Feker ayuu galay.

Muxuu ka fekerayaa tolow? Ayay isweydiisay iyadoo fadhida sariirti uu ku naageystay marar badan oo hore, iyagoo sidii webiyo isku ooman iskusoo butaacaya.

Telegram@SOMALIBOOKS

■■■

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

CUTUBKA SHANAAD

Habeen saqdhexe ayay dareentay in wakhtigeedii la gaaray. Subixi ilaa barqadi ayuu nabarku hayay. Casarki iyo fiidkina nabarku wuu kasii darayay. Muuse ayaa dhinac jiifay markuu nabarka weyn qabtay... Gacantiis aayay xoog uqabsatay... Waa lagaaray ayay kutiri. Tagsi noo wac!

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxay ku umushay wiil kasoo raagay todobaad iyo bar wakhtigi loo qabtay. Wuxuu ahaa wiil weyn, afar kiilo ku dhaw culeyskiisu, dhererkana ay umulisooyinki la yaabeen. Waxba ha la yaabina, aabihiis iyo awoowgiisba saa ayay u dheeraayeene.

Xanuunki hayay Mulki waxaa hilmaamsiiyey arooryadaas markey aragtay Muuse. Wiilkiisa ayuu shafka ku hayay!

Garabka ayuu hayay Mulki ilaa sariirta laga geeyo, intii ay foolaneysayna gacanta ayuu gacanta ugu hayay oo xasuusinayay ineysan keli aheyn. Neefso! Ayuu lahaa isagoo la

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

danqanaya. Isagoo dhinac taagan ayuu ilaah u baryayay. Ilahow u fududee waxaan wax sahlan maahee! Ayuu hoosta kalahaa. Markuu wiilkoodu dhashay ayuu eegay Mulki, xaaskiisi, gabadhi uu Adis ku nikaaxsaday , wiilkiisa hooyadii,... ilaah waa kuu fududeeyey! Ayuu kuyiri. Ducada laga aqbalay ayuu ilaah uga shukriyey.

Wiilkiisi ayuu shafka ku qabtay oo eegay! Ma ii egyahay? Ma anigaa dhalay? Wejigiisa wiilka waxaa ka muuqday barar, cagahiisa yaryar wey guduudnaayeen, markuu qufaco waxaa ka imanayay xab. Maxaa ku jaban haduu xab igu daato! Sow xabkii wiilkeyga maaha! Ayuu uurka ka yiri isagoo iska tiraya. Maxaan kuu keenaa? Ayuu weydiiyey Mulki oo tabaryar. Waa inaad wax cunto waad rafaadee! Ayuu beernugul tusay. Markey kadiideyna wuxuu ukeenay cabitaan liimo laga sameeyey. Koobki ayuu afka usaaray, dhuuq buu yiri tubo bakeeriga ku dhex jirtay oo loogu talagalay in lagu cabo.

Telegram@SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Noloshooda wax badan ayaa iska bedelay. Beernugeyl iyo naxariis ayaa ilaah dhexdooda dhigay. Maalin uu saaxibkii isbedelka uga warammay Muuse waxaa la baray dhaqanka hablaha soomaliyeed. Wuxuu saaxibkii oo ahaa odey reer baadiye ah usheegay in hablaha soomaaliyeed marka lasoo guursado iyo markey weynaato labadaba sidii aarki u ilko adag tahay. Inta udhaxeysana waa qof la dhaqan karo. Ayuu yiri. Markey cusub tahay waxay dooni inay kuu taliso, markey gaboowdana sidoo kale! Ayuu ujilciyey. Inta udhaxeysa waa xilliga aad kujirtid hadee waa raxmad! Sida aad xaalkiina iigu sheegeyso weeye. Heer sare! Naxariis, beernugelyl iyo waxay ku tusayaan jaceyl, inaad odeygi aqalka tahay.

Telegram@SOMALIBOOKS

Labada qof hadii ay calaf isku leeyihiin wey isla joogayaan. Hadii kalena cid ama wax isku heyn kara majiraan. Labada qof hadii guurkoodu uu ku saleysan yahay dareen jaceyl, kalsooni, naxariis, is aaminid, damacwadaag iyo alla ka cabsi aalaaba guurkoodu wuu hagaagaa. Hadii intaa lawaayo wuxuu guurkoodu ku danbeeyaa naar aduun iyo dalqo furitaan. Intaa odeygu ma ogeeyn.

Muuse iyo Mulki guurkoodu ilaah wuxuu uga dhigay naar aduun. Labadooduba kuma faraxsaneyn nolosha ay ku nool yihiin. Is-af-garad-waa iyo nolol cariiri ah ayaa habeeno badan sariirta dhigay iyagoo uurka ka booyaya.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Intuu wiilkoodu kasii korayo waxaa sii yaraanayay nolosha ay wadaagaan labadooda. Midba midka kale ayuu ula dhaqmi jiray sidii hawadi. Markuu rabo inuu wax usheego wiilka ayaa la iska soo mari jiray. Markii la qo slayo wiilkaa ayaa lala qoslaa. Labadoodu wax ay wadaagaan wey yaraayeen. Xataa dhaqaalaha oo ay markii dambe kala qeybsadeen. Ceyrta qofba walba intiisa ayay usoo diri jirtay. Markuu Muuse aqal kale iskusoo qoray wixiisa halkaa ayaa loogu diri jiray.

Mulki wixi lasiiyo iyadaa maamulan jirtay. Waxay kirada kudhiibto, waxay wiilkeeda iyo raashinka guriga ku iibsato iyo waxay udirto hargeysa iyo Adis ay ahaayeen.

Telegram @SOMALIBOOKS

Sidaan wax ka fiican maleh! Ayay Eedadeed u sheegtay Mulki. Dadkaaga haduu damcay inuu kaa gooyo ialah baa kaaga hiilinyey. Gaaladaa ilaah naxariis kuu geliyey. Sow lacagta caruurta adiga laguma siiyo? sow aqalka adiga kuma qornid? Sow masruufkaadi iyo mas'uulki kiradaba adiga laguuma dhiibin. Naag ilaah uu jecelyahay baad tahay Eedo! Ayay eedadu usheegtay Mulki oo ku faraxsan xorriyada dhaqaale oo ay gaartay. Waa guul ilaahey kusiiyey! Ayay tiri eedada, kuna guubaabisay Mulki inay eebe uga shukriso nimcada.

Muuse qudhiisu wuu ku qanacsanaa xorriyada dhaqaale oo uu isaguna gaadhay. Karoomaadka uga soo dhaca xafiiska shaqada inyar mooyee

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

isagaa maamulan jiray. Wuu ka nastay wixii biilka ahaa oo uu kala bixin jiray. Madaxaa ii degay! Ayuu saaxibkii usheegay.

Sidaa oo ay tahay labadooduba kuma qanacsanayn sida uu reerku yahay. Mar kastaa oo ay kala maarmaan waxaa sii yaraanaayay baahida inay iskaashadaan. Waxaa sii yaraanaayay dareenka jaceyl oo ay isku hayeen, jir ahaan iyo naf ahaanba. Waxaa sii yaraanaayay wada qorsheyntooda mustaqbal.

Sidey damacsan tahay in wiilkeenu ku koro iyo awlaada kalee ilaah na siin doono? Ayay isweydiinayay

Telegram @SOMALIBOOKS

Siduu damacsan yahay inuu yeelo kol hadii aan ka maarmay oo ilaah iiga hiiliyey? Ayay isweeydineysay

Reerkoodu wuxuu noqday baabuur labo isteerin leh oo ay labo shufeer kala wadaan. Qof walba sidii qancisa ayuu yeelayay. Markuu doono ayuu Muuse u safri jiray halkuu doono. Markey doonto ayay uga dhaqaaqi jirtay wiilka ay u dhashay oo xaafado ilaa saqdhexe soo sheekeyn jirtay. Wax reerka loosoo iibiyo midna mid ma wareysan jirin. Waxaa dhamaaday ixtiraankii iyo naxariistii ay isku lahaayeen, waxa yaraaday xushmadi, dareenkii jaceyl iyo alla ka cabsigi, labadooduba tii ilaah saaray ayuu kasoo bixi waayay ilaa ay maalinkii dambe isagoo wiilka guriga ku cayaarsiinaya ay

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

uga dhaqaaqday. Waxay kusoo noqotay saacad ku dhawaad kadib, iyadoo rag somali ah masaajidka uga soo kaxeysatay.

- Sadexdeyda ninkan ha la iga siiyo! Ayay dalbatay

Muuse oo argagaxay, yaaban oo la fajacay waxa hortaagan inay dhab yihiin ama dhalanteed ayaa ereyba kasoo bixi waayay afkiisi. Ma fileynin arrinka. Maxaan kaa sameeyey? Ayuu weydiiyey. Xalay dhinaceeda ayaan kasoo kacay, saaka aqalkaan la hagaajiyey! Qadada intey karineysay wiilka yar ayaan ka hayay! Markaasaa *pang!* Sidi baaruud qaraxday afar wadaado ah i hortaagan yihiin.

Telegram @SOMALIBOOKS

- Waad mahadsan tihiin ayuu yiri inaad xaaskeyga soo raacdeen. Sida aad fahmi kartaana arrinka ma aha mid wadaado uyaala. Marka hore aniga iyo iyada aan wada hadalno oo wada fahanno meesha dhibku ka jiro, dabadeed hadii aan isfahmi kari weyno arrinka waa arrin uyaala qaraabada.

- Qaraabadaada iyo adigaba waan idinku daalay ee madaxeyga halkaas ii dhig! Ayay cod cadheysan kaga dalbatay iyadoo maciin ka eegeyga wadaadada cimaamadaha garbaha usaaran yihiin.

Wadaadada kooda ugu weynaa, ayaa garka gacanta ku salaaxday, ereyada uu rabo inuu sheego ayuu isku miisaamayay inteysan afka

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

kasoo bixin. Wuxuu ku lebisnaa shaar dheer ilaa jilbaha dhaafay iyo surweel isku dhar laga tolay sidi shaarka oo inyar ka muuqda. Caloosha ayuu gacanta kusalaaxday oo gabadhi eegay.

Wuxuu usheegay inay horta sheydaanka iska naarto. Ilah laga cabsado. Akhaafulaah! Hadii dad qaraabo ah ay magaalada joogaana iyaga arinka ha lagala tashto. Waa sida diintu qabtee! Ayuu udalliliyey xadiis ereygiisa. Dadku waa is dilaa! Ayuu ku yiri. Diintuna waxay qabtaa in oorida si fiican loo dhaqo, iyadana ay ninkeeda xushmad iyo karaamo tusto. Hadii calafkiina dhamaaday wax isku kiin heyn kara ma jiraan ee bal qaraabadana la tashta. Waalidkaa ma joogaan?

Telegram @SOMALIBOOKS

- Maya

- Walaalahaana?

- Maya

- Adeero iyo abtiyo?

- Maya! Maxaa waaye interfiyuugan...wah!... ninkan usheega inaan ka fasaqday fadlan. Sadex sanadood iyo bar yaan is heysanay, aniga qof bini'aadam ah ayan ahay, ma awoodo inaan sidaan ku noolaado. Fadlan i fur. Marqaati waa joogaan maanta ee sadexdeyda isii! Ayaya Muuse oo yaaban laakin ku qanacsan wadaadka khudbadiisa eegtay.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Wey ka xishootay inay tiraahdo aqalkeyga iiga bax. Wey dhihi kartay saa iyadaa guriga ku qorneydee. Ma yeelin ee waxay sugtay ilaa fiidki. Markaa oo ay keli noqdeen.

- Aniga iyo adiga ma wada noolaan karno, fadlan yaanan been isku sheegin, kuma jecli, adiguna ima jeclid ee aan is fasaxno. Labadeenaba dad yaryar baan nahay, wiil kal e ayaan heli karaa, adigana gabar kale oo nolol farxad leh kugula noolaato ayaad heli kartaa. Been yaanaan isku sheegin, waxbadan baan been kusoo nooleeyn. Yaanan is cadaadin oo noloshan naarta ah yaanan u maleyn inay wax iska bedeli doonaan. Anigu kuma jecli! Ayay ku tiri. Hadii uusan wiilkan joogeena mar horaan boorsadeyda xiran lahaa oo kaa dhaqaaqi lahaa. Lakin wiilkeyga aabihii baad tahay, labo qof oo qaraabo ah baan nahay yaanan isdhibinee madaxeyga iska key sii! Awlaad kale ma soo socoto! Ayay usheegtay. Waan isxirayaa hadaad iqasabto xataa. Meeshaas ayaan kaa taagan nahay!

Telegram@SOMALIBOOKS

Muxuu sheegaa nin naagtiisi ay sidaa ula hadashay! Wuu ogaa in xaalkoodu beriga dhexe yahay! Wuu fahansanaa in aqalkoodu burbur taagan yahay: saa oo ay tahay ilaah buu maalmo wacan ka rajeynayay. Wejigeeda iyo bushimaheeda markaa ay hortaagan tahay wuxuu ka garan karay; inta ay la egtahay

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

cadhada ay u qabto, sida ay nolosheeda u diidan tahay.

Qaraabada ayaan ku go'aa ayay yiri. Qaraabadi markii ay kari weysay inay reerki isku celiyaan, ayay waxay soo jeediyeen inay soo kala nastaan. Muuse ayaa lagu booriyey inuu ka guuro oo in mudoo ah kadib arrinkoodi misna loo fadhiisto. Waxaa la yiri beryihii hore dhaqanka soomaalida wuxuu ahaa, markii ay gabadha ninkeeda kasoo cadhooto waxay usoo carari jirtay aqalka aabaheed, halkaa oo ay ayaamo ku nasan jirtay ilaa looga caqliceliyo, laakiin maanta meel ay ucararto waxaa ka jira un xaafiska ceyrta. Aqalka ceyrtaa aqalki aabe noqday. Ceyrtuna caqli celis dhaafee iyadaa caqliga qofka uga cayaareysa. Markaa maxaa xal ah?.

Telegram @SOMALIBOOKS

Xalku wuxuu noqday in isaga lagu booriyo inuu aqalka isaga haajiro. Oo mar hadii ay uxiisto saa waa ninkeediye iyadaa wax maqli doonta xilli gaaban kadib. Xilli gaaban kadib.

Laakiin Mulki cidna uma xiisin. Go'aankeedu wuu caddaa ilaa berigey ugubka aheydba waxay ku riyoon jirtay nolol aanan aheyn tana ay Muuse la qeybsato. Marar badan ayay isku sheegtay in wax isbedeli doonaan. Laakiin misna runti ayay istusisay intey xaamilada aheyd. Waxaan u dhalayaa caruur- ayay isku sheegtay – nin aanan i daryeeleynin, nin aanan hammi aduun laheyn, inuu meel gaaro ku

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

riyoonin, nin aanan walidkeey iyo walaalahey kala jecleyn. Aduunka oo idil wuxuu ka dhigay wax khariban. Waa la i cunsuriyeeynayaa, muslim baan ahay, madoow baan ahay, soomali baan ahay oo cidi shaqo iima ogola yuu ku dhihi jiray kolkey kusoo qaaado inuu camal yeesho. Ma doonayo inuu wax barto. Wuxuu lahaa anigoo sodon iyo shansano ah miyaan iskuul dhex fadhiistaa sidi caruurti? Aniga ima daryeelo, Raga caruurta u roon ma aha, inaan ku khasbo oo ku gaado mooyee wiilkiisa surweel kama bedelo. Sawirada madaxa Mulki kusoo dhacayay waxay u badnaayeen sawiro tusaya halka uu Muuse ku xun yahay!

Telegram @SOMALIBOOKS

Laakiin markaa uma muuqan halka uu ku fiican yahay, inuu weli masruuf siiyo xitaa isagoo kiro meel kale ka bixiya oo dakhligiisoo iska yar. Inuu sabtiyo iyo axadaha wiilkooda ka kaxeysanjiray oo isagoo faraxsan soo celin jiray.Inuu walaalaheed xiriiriyo ma ogeyn iyadu, inuu aalaaba hadal degan kula hadli jiray markey kacsan tahay ma xasuusato. Wey iloowday inta goor oo u uhab iyada siiyey isagoo ilmadu kutaagantahay. Ma oga inuu jecelyahay wax ka badan kolkuu soo nikaaxsaday.

- Yaa jaceyl iyo xurmad la tusin karaa? Ma ruux markaad aqalka kasoo gasho qeylo kula

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

hortaagan yaa naxariis iyo jaceyl la tusi n karaa? Ayuu isweydiiyey.

- Waan ka fekerayaa waxaad itiri! Ayuu usheegay. Wuu eegay, barsada ayuu u dhaqaaqay, salak ayuu kursi la helay. Xabad sigaar ah ayuu la soo baxay. Bushimaha ayuu ku qabtay. Dab ayuu ku shiday. Wuxuu dhuuqay ayuu afuufay.

Habeenkaa saqdi dhexe ayuu salaad u istaagay. Waxay aheyd jimce. Waxaa caado u ahaa inuu salaatul leyl tukado habeenada jimce ah. Ilaahow xaaskeyga baaryiyad iiga yeel! Ayuu ku duceystay. Ilaahow qalbigeena isku qabooji! Ilaahayoow dhexdeena raxmad keen. Ilaahayoow hadii calafkeenu dhamaaday noo fududee arrinka. Ilaahayoow dagaal marabee degeenaan isii.

Telegram @SOMALIBOOKS

■■■

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

CUTUBKA LIXAAD

....hadii aad dooneyso inaad isoo wacdo taleefankeyga waa...031- 43 33 88.

Mar labaad ayuu shiday cajaladi taleefanka akhbaarta loogu dhaafay intuu Göteborg kasoo socday. Wuxuu eegay saacada codka laduubay. Sagaalki fiidnimo iyo sadex iyo toban midhidh. Waa intuu soo socday Stockholm.

Waa lagu salamaay Waa Mulki. Gabadhi aad isku barateen Götebo-g daraato. Waxaan nambarkaaga kasoo helay saaxiibteey Abyan..... waxaan rabay inaan ku salaamo keliya.. waa ku kaas... hadii aad dooneyso inaad isoo wacdo taleefankeyga waa...031- 43 33 88

Telegram @SOMALIBOOKS

Mulki! Ayuu magaceeda hoos u yiri. Mulkiyeey maxaad aheyd? Ayuu weydiiyey sidi inay horjoogto. Wejigeeda ayuu soo xasuustay kolkuu gaariga ku waday oo uu kasoo qaaday xaafada adeerkii Yusuf, wuxuu geeyn lahaa aqalkeeda. Keligeed iney nooshahay sidiisa ayuu ogaaday! Caruur ma leedahay? Ma weydiinin. Abyan wixii ay sheegtay ma run baa? Ma la qabaa Mulki? Hadii la qabo maxay taleefankeyga usoo siisay naag la qabo? Ayuu Abyan u cadhooday.

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Maalmihii xigay Axmed marar badan ayay niyadiisa kusoo dhacday. Wuxuu dareensanaa wax uu jaceyl mooday. Ma wicin. Wey kusoo wici doontaa! Ayuu rajeeyey. Masoo wicin iyaduna. Haduu dan iyo xiiso iga leeyahay wuu ila soo hadli doonaa! Ayay isku sheegtay.

Habeen arbacaad. Oo laga joogo sadex habeen markii ay codka ugu duubtay cajalka, ayuu marki sagaalaad shitay codkeedi. ”*Waa lagu salamaay” Waa Mulki. Gabadhi aad isku barateen Göteborg daraato. Waxaan...”*

Telegram@SOMALIBOOKS

Naastaradi ayuu codki kor u qaaday. Codkeeda ayuu dareemay sidi inay qolka la joogto. Wuxuu maqlay sidi inay leedahay, axmadow ma ogtahay inaan ahay habeen dhalad ahiyo, hillaaciyo hawo rageed. Wuxuu u heesay Mulkiyeey amaad tahay tu hawada la cayaartoo rag hammigii disha? Ha ka cabsan ee cishqiga ila qabo! Ayuu maqlay iyadoo u jawaabtay. Mulkiyeey hubsiino halbaa la siisataayee aabahaa inaan hubsado sow maaha! In lagu qabo inaan hubsado sow maaha? Ha jabin oo ha dhicin, ha raagin adigaan kuu hogaansanahaye! Ayuu maqlay cod uusan wejigiisa arag.

Muxuu usoo weci la’yahay? Ayay isweydiisay Mulki habeenkii khamiisaad! Habeenkii ay wacday waxay rajeyneysay inuu ka jawaabo oo ay kula xifaaltanto *”adiga waa iska soo baxee miyaa adigoo aanan dadka macsalaameyn”*

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Waxay ku odhanlaheyd *waan ku faraxsanahay inaan ku barto.* Waxay weydiin laheyd *goormaad Göteborg kusoo noqon doontaa?* Laakin ma dhicin oo naastaro ayaa akhbaarti ka qaaday. Ma dhageystay horta codkeyga? Ma hubto!

Sideed maalmood markuu midba meeshiisa isku adkeynayay ayay habeenkii sagaalaad lasoo hadashay. Yaa waaye ayay kutiri markuu taleefanka kaqabtay. Wuu ogaa inay Mulki tahay! Gabar soomali ku hadasha taleefankiisa maba soo wici jirin.

Waxay u sheegtay in taleefankan laga soo wacay tobankii oo rubi dhiman, saacad ka hor. Mulki miyaa? Ayuu weydiiyey isagoo huba. Inkastoo uusan hore taleefan kula hadlin hadana codku wuxuu shabahay codkii cajaalada ugu duubnaa oo uu tobaneeyo mar dhageystay sagaalki beriyee lasoo dhaafay.

Telegram @SOMALIBOOKS

- Haa waa Mulki

Anigaa kaasoo wacay taleefankeyga gacanta. Markaad iga qaban weysayna waan dhigay. Wey ka raali gelisay. Waan qabeysanayay ayay ku tiri. Markaan taleefankaga arkayna ma aqoon nambarka taleefankaada gacanta. Nambar kale ayaan ka aheystay 08 ka biloowda.

Qabeys? Ma qabeysaneysay markaad wacay? Tolow sidey u egtahay markey biyaha hoos

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

taagan tahay? Wuu ogaa inuu dherer ahaan wax yar uu isaga kadheeraa. Timaheeda wuxuu sawirtay inay qoorta dhaafeen dhabarkana taabanayaan markey biyaha kusoo dareeraan madaxeeda. Afka ayaa yara furan markey ku dhacaan biyaha qandaca ah uu jirkeedu ku qabeysanayo... waxoo dhan buu sekeno gudahood ku sawirtay.

- Oo adiga labo taleefan maxaad ku fashay . Mid guriga iyo mid gacan?

- Yaah!!!... ayuu riyadi katoosay. Maxaa...? in dadku i helaan sowmaaha meel walboo aan joogo.

Maxey ka sheekeystaan. Isaguna diyaar uma aheyn taleefanka qeyliyey, iyaduna ma ogeyn inuu Axmed yahay ruuxa ay wacday. Waxay wada hadlayeen nus saacad. Hadalkuna wuxuu ku koobnaa, arooskii ay ka qeybqaateen todobaad ka hor, abyan ina adeertii axmed, Göteborg iyo Stockholm. Ha la is xiriiriyo! Ayay ku dhaaftay.

Kulankoodi labaad ma raagin. Axmedhabeenkii xigay ayuu sugi waayay. Fiidkii markuu shaqada ka yimid, casho cunay, emailadiisa eegay, facebooka dhowr qoraal ku qoray ayuu taleefanka qabsaday. Markuu isyiri faceboога demi ayuu arkay akhbaar la tusayo. *QueenMulki* ayaa rabta inay kula saaxiibto ee ma aqbalaysaa?. Wuxuu arkay sawirkeeda.

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Haa ayuu riixay. Markuu galay beyjkeeda, gabadha uu saaxibtinimadeeda ku aqbalay facebooga, ayuu riixay informationkeeda. Da'deeda 27, Ku dhalatay; Soomaliya, Diin; muslim, Xiiseyneysa; rag iyo dumar saaxiibnimo. Guur; keli.....Markuu akhriyey ayuu ka fekeray ereyga "keli" singel...lama qabo!

Wuxuu riixay khaanada sawirada. Afar sawir ayaa ku jira. Mid waa iyada oo weji ah, labo iyadoo taagan mid meel doog ah, midna guri dhexdiisa, sawirka afaraad waxay dhabta ku heysaa caruur yar. Ma iyadaa dhashay? Sawirki ay keliga taagneyd aqalka gudihiisa ayuu riixay, wuu weyneeyey sawirka cabirkiisii hore, wejigeeda ayaa soo dhawaaday... Indho yaryar oo balaadhan ayaa soo eegay, si wacan khad loogu dhayay..dhabanada ayuu eegay, wey isla siman yihiin, dhalinyaronimo ayaa ka muuqda, ilkaha ay bushimuhu qeyb ka qaadanayaan ayuu eegay, wey siman yihiin. Bushimaheeda ayuu eegay, waa khad, waa jileec, waa qandac ayuu ka dareemay. Wuu cowdubileeystay. Wat am i doing? Ayuu isweydiiyey.

Telegram @SOMALIBOOKS

Habeenkaa isagoo niyadiisu qasan tahay ayuu seexday. Suubixii wuxuu eegay facebuuga. Wax miyey qortay? Ma aragtay inaad aqbalay saaxiibtinimadeena? Maya waxba ma muuqdaan.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Duhurkii maalinkaas isagoo xafiiskiisa fadhiya ayay iyaduna eegtay emaliladeeda, facebuuga. Yes! Wuu i aqbalay ayay aragtay akhbaarka u yaala. Yes! Waxay eegtay informationkiisa iyo sawiro sodomeeyo ahaa oo ku keydsanaa koontadiisa facebuuga. Waxay ka eegtay gabadh la sawiran! Waxay ka eegtay calaamad! Sumad, wax un, ay ku garato Axmed qofka uu yahay. Soomali isagaa ka ah, dadka tiradoodu gaadheyso labaatameeyada oo uu la sawiran yahay. Ayay hoosta ka xariiqday. Yaab!

Telegram@SOMALIBOOKS

Xiriirkoodu bilihii raacay wuxuu ahaa markii hore mid xawaare dheereeya, mararka qaar waxaa macquul ahaa inay maalin qudha sadex ama afar goor isla xiriiraan. Mar facebuuga, mar sms, mar taleefan marna emailka. Bishi december waxay is yaqaaneen lix bilood. Jun dabayaaqadeedi ayay arooski isku barteen. Bishi december ayay soo gelisay akhbaar guud facebuuga. “barnfri chrismas”. Waxay ogeysiisay asxaabteeda facebuuga in fasaxyada kirismaska ay keli tahay, oo wiilkeedu ka maqan yahay.

Axmed oo arrinka ku farxay ayaa markiiba wacay Mulki. Waxay aheyd goor fiidah. Waxay u sheegtay in wiilkeeda afar jirka ah uu aabihii la maqnaan doono bisha soosocota. Xilliga fasaxyada ayuu aabuhu soo doontaa wiilkiisa,

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

wakhti badan ma arag siday u kala tageenba. Ayay usheegtay.

- Maxaa kuu qorsho ah? Ayuu ka wareystay bishaas

- Inaan raaxeeysto! Ayay tiri

Raaxeysto? Maxey ula jeedaa raaxada? Sidee u raaxeysanee? Ayuu isyiri bal fahan ereygeeda. Habeenki inaan saani useexdo ilaa waagu ka baryo! Ayay tiri. Subixii inaan soo tooso ilaa uu jirku ka dhergo, raashinka inaan cuno kolkuu jirku doono...

Telegram @SOMALIBOOKS

- Kawaran hadaad Stockholm timaadid? Ayuu weydiiyey.

- Stockholm?

Weligeed ma aysan arag Stockholm. Walaahi qorshayaal kalaan lahaayee! Ayay dabaqa sare ka kortay. Wuu ogaa in hablaha soomalida shukaansigooda lagu dhaamo. Alla dhib badanaa! Ayuu iscowlay. Dabaqaa ayay isi saaraan kolkaad... Siduu uga soo dejiyaa dabaqa ay fuushay. Maxaa salaan ah oo uu ku koraa?

- Waxaan islahaa Göteborg ha kasoo nasato! Ayuu irxin naxariiseed tusay inuu nafteeda kala jecelyahay. Qudheydu fasax ayaan ahay labo isbuuc, isbuuca sagaal iyo labaatanaad iyo kan sodonaad qorsho ma lihi, waxaan islahaa.. ayuu afnugaal tusay.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Sawirka Stockholm ayay sawiratay. Ereyga ”göteborg kasoo naso” ayaa soo jiitay. Hadana ma hubin inuu ficilku yahay mid quman. Muuse oo aanan weli sadexdeedii siinin hadii Stockholm laga sheego sow kuma ceeboobeyso! Muuse todobo bolood ka hor ayuu ka guuray, wuuna diiday inuu furo dad kastoo loo diray. Ragii ugu dambeeyey oo gogol kula kulmay markii ay gogosha kula hadleen ayuu yiri. Ragoow i dhageysta! Waan furayaa gabadhi laakiin hal shuruud! Markii ay ka wareysteen shuruuda wuxuu kuyiri, hadii aad dumarkiina soo furtaan aniguna diyaar baan ahay inaan Mulki idiin furo.

Sidaa oo ay tahay dhaqan ahaan waxaa ceeb la noqotay Mulki in laga sheego Stockholm iyo nin aanan qabin aqalkiisa.

- Waan kasoo fekerayaa ayay tiri, ilaa habeen danbe akhbaar iga sug.

Habeenkaa hurdada intaysan gam’in Axmed iyo Stockholm ayay ka dhaxeeysay. Hadii ay oori ”fiican” iska noqoto xaalkeedu intaa wuu ka sahlanaan lahaa. Hadii ay Muuse i cafi tiraahdo. Hadii ay raaliyad ninkeeda hadalkiisa maqasha noqoto, dad iyo qaraaboba wey qadarin lahayeen. Waxaa loo arki lahaa gabadh rerkeeda dhaqata, iiman leh oo hooyo iyo oori fiican ah. Sidi dumarka kale ayaa loo qadarin lahaa. Laakiin ayay fekertay da’deydu waa 27. Ma sidaan ayaan cimrigeyga ku dhameystaa?

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Ma Muuse ayaan la waayeelooba? Mise nolol kale oo aan ku faraxsanahay ayaan raadsadaa! Wixii doonaba ha la yiraahdee.

Yeelkadeed hadii la yiraahdo Sweden ayay ku timid, dowladeey ku dacweysay, iyadoo laqabo ayay rag kale la tuman jirtay...wax jira iyo waxaan jirinba dadku wey isku qasaan. Wey ogtahay! Diyaar ma u ahay? Ayay isweydiisay inay diyaar u tahay dacaayadaa iyo sawirka laga fidin doono?

Cidna kama aqoon Stockholm marka laga saaro wiilka ay baro isleedahay. Wiilka ay tuhuntay inuu xiiso u qabo. Wiilka dhaqankiisu ka duwan yahay rag kuwii hore ay usoo aragtay. Ilaa aabaheed ilaa Muuse ninkeeda. Wey yaabaneyd. Maxaan falaa? Maxaan yeelaa!

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxay rabtay inay Axmed wacdo xilligaa. Saacadu waa saqdhexe. Sariirta ayay ilaa fiid ki ku dul fekereysay. Waxay rabtay inuu hurdada ka tooso oo yiraaho maxaa daran macaanto. Waxay ku odhan laheyd: amakaag, argagax iyo yaab aboowe macaanoow waxaa iidaran... ayay uga bilaabi laheyd. Ma ogtahay ayay wargelin laheyd.. wax uusan nolosheeda ka ogeyn... dareenkeeda ayay uga warrami laheyd, rajadeeda ayay u qeexi laheyd, aayahooda ayay la falanqeyn laheyd ilaa waagu ka baryo.

Anba abaar iyo oon baan kuugu oodanahee! Ayuu uga bilaabi lahaa. Ayay istiri. Wuxuu uga

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

warami laha inuu abaal uga heyn doono h adey siiso fursad ay isku bartaan. Ilaah inuu uga shukrin laha la kulankeeda ayuu ballanqaadi lahaa. Dabadeedna wuxuu usixiixi lahaa inay tahay ileyska uu aduunka ku eegto. Afada uu donayo inuu la waayeeloobo, awalaadiisa hooyadood..

Saacada ayay eegtay. Waa sadexdii arooryaad oo toban daqiiqo la'. Waa xilli dambe! Sariirta ayay kasoo istaagtay. Suuliga ayay gashay. Ilinka banaanka inuu xiran yahay ayay markale soo eegtay. Kushiinka ayay soo martay oo galaas biyo ah kasoo cabtay. Ilahoow halkii ii fiican itusi! Ayay ku duceysatay madaxeeda oo buuxa! Wey gama'day.

Telegram @SOMALIBOOKS

Axmed wuxuu subaxaa ahaa maqane-jooge. Xafiiskiisa ayuu yimid sidi caadada u aheyd sideedii iyo badh. Albaabka ayuu hoosta ka xirtay. Intuu soo socday wuxuu isku ciilayay inuusan si fiican uga iibin fikradiisa inay utimaado Stockholm. *Inaad Göteborg kasoo nasato!* Waa laga fiicnaa.ayuu isyiri. Waxaa la rabay inaan uga warramo waxyaalaha Stockholm ay caanka ku tahay, waxaa la rabay inaan usheego meelaha aan soo tusi doono! Ayuu isyiri. Dhowr goor ayuu ku celceliyey waxyaalaha uu ku odhan lahaa. Isagoo ka cabsi qaba inay u iman weydo.

Ishiisa ayaa waxay qabatay taleefanka. Markiiba wuu dafay. Wuxuu garaacay *031-*

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

43..... neefta ayuu xoog uqaatay, misna taleefankii isi saaray oo isku sheegay in laga fiican yahay inuu hada waco, hadiiba ay ku tiri iga warsug ilaa caawa, sow inaan sugo maaha. Ayu uisi su'aalay. Maxaa ku jaban hadaan waco? Ayuu isi su'aalay. Inaan xiiseyneyso umbey ogaan doontaaye. Mar labaad ayuu taleefankii dafay.. *031- 43 33* 88. nambaradi ayauu fartiisa murugsato ku boobay..dhag dhag dhag..

- Helow! Ayuu qadar yar ka dib fiilada dhinaceeda kale ka maqlay codki uu yaqaanay.

- Haa.. waa Axmed..

Iyadoo jiifta ayuu toosiyey. Waa kow iyo tobankii duhurnimo. Xalay ayay wakhti dambe seexatay.

- Waxaan kuu soo wacay arrinki aan xalay iskusoo qaadnay! Ayuu hadalki yoolkiisa ka bilaabay.

Waa dhaqankiisa, waa dhaqan Swidhish. Dhaqanka soomaaliga dadku markey isi soo wacaan wey is salaamaan. Salaan iyo wareysi. Waxay iska wareystaan nolosha, wararka cusub, qaraabada, deriska, shaqada kadib markaas ayay nuxurka isweydiiyaan iyo sababt ay usoo waceen. Dadka iswiidhishka ah aalaaba waxay hadalka ka bilaabaan yoolka ama nuxurka hadalka. Helow, ma imaaneysaa? Hellow ma heshay...heloow maxay aheyd...

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Hadalki ayay ka sugtay

een... waxaan ku farxi lahaa hadii aad isoo booqato. Waxaan kusoo tusi lahaa aqalka aan kunoolahay, caasimada Sweden ayaad soo arki laheyd, waxaan soo booqanlaheyn Skansen, waxaan ku geyn lahaa cayaaro indhosarcaad lagu qabanayo Globen, waxaan w ada fiirsan laheyn filin cusub oo shineemada yimid wiigaan. Waxaan ka wada casheyn laheyn restaurantiga aan Stockholm ugu jeclahay. Cuntadiisa iyo maaweelada waad la dhici doontaa! Waxoo dhana anigaa qarashka qaba!

Qarashka qaba! Dhaqankiisi baas baa misna soo baxay. Ma marti aad casuneysid ayaad lacag weydiin laheyd? Teeda kale ma Skansen iyo Globen ayuu hubaa inay xiiseyneyso gabadhan?

Codkiisa xitaa isaga ayuu u muuqday inuu qajil kujiro, inuu xoogsanayo, inuu dardarayo duur uusan aqoon u laheyn. Wuxuu maqlay iyada oo ka qosleysa fiilada dhinaceeda kale.

- Mahadsanid! Ayuu maqlay cod qoslaya. Waxaa u muuqday ilkaheeda cadcad, wuxuu istusay dhabanadeeda la balaartay dholacadeeynta. Caawa ayaan kusoo wacaa! Ayay kutiri taleefankina ku dhigtay.

Miyey xishootay markuu soo wacay iyadoo weli sariirti kala talaa? Ma waxay islaheyd wuu ku

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

arkaa sidaad u egtahay? Iyadoo aad moodo in degdeg kujirto ayay taleefanki ku goysay. Waxay soo xasuusatay inay balan kowda duhurnimo la laheyd xafiiska shaqada. Saacad aya au muuqatay. Waa labo iyo tobankii iyo rubuc. Sariirti ayay ka booday. Saacad kadib waxay gacanta u dhiibtay howlwadeenkii xafiiska shaqada. Waxaa laga wareystay inta shaqo oo ay dalbatay? Arjiyadii ay udirtay shirkadahaa ayaa koobigooda laga qaaday. Waxaa lasoo siiyey ballan kale bisha janaayo tobankeeda.

Axmed oo yaaban ayaa taleefanki isi saaray oo eegay taleefanki qadar dheer. Maxay sidaa degdegta ah iigu dhigtay taleefanka? Ayuu isweydiiyey. Inaan ka warsugaa la ii qaatay ayuu hadana isciilay.

Telegram@SOMALIBOOKS

Fiidkii ayuu hadalkuu sugayay helay. Waxay lasoo hadashay sidii caadada aheyd xilli dambe habeenkaa isagoo sariirta tagay. Kow iyo tobankii ayuu sariirta yimid. Hadeysan isoo wicin anigana ma wacayo caawa ayuu goostay intuusan sariirta iman. Maxaa iskugu kaa dhacaya? Ayay su'aal reer magaal weydiisay. Sariirta ayaan joogaa ayuu yiri, fiidki ayaan warkaaga sugayay! Ma dhirfay? Ayay isweydiisay mise wuu sheexayaa? Ma xanaaqsana, mana ka xishoon ee wuxuu sugayaa jawaabta casumaadi uu casumay.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- Waxaan goostay inaan kuu imaado ayay tiri! Caawa waa arbaco subaxa jimcaad ayaan isleeyahay inaan iman karo. Waxaan eegay shirkada gaadiidka tareemada waxaa jira tareen Göteborg kasoo baxaya lixda aroornimo. Sagaalka iyo rubucna Stockholm imanaya. Maxay kula tahay.

- Perfect! (waa sidaan rajeeynayay! Ayu niyada ka yiri)

- Waxaan kuu taaganahay T-centralka! Ayuu usheegay

Lixda aroornimo waa xilli arooryaad ah. Dad badan ma socdaan xilligaas. Cid arkeysa iyadoo sii boorso weyn ma jirto. Cid boqol su'aal jidka ku wareysaneysa ma jiraan. Ma jiraan cid su'aaleysa; xageed us afree? yaad ku degee? Imisaad soo maqnaanee? . Wey ogeyd in dadka soomalidu su'aalo badan yihiin. Markey kala dooraneysay tareemada Stockholm ubaxaya wey ogeyd in lixda arooryaad xilli fiican tahay.

Axmed wuxuu habeenkii khamiisaad markuu shaqada ka yimid kala nadiifiyey aqalkuu ku noolaa. Wuxuu ka helay qashin badan oo aan in badan la isticmaalin. Wuu kala tuuray wixii sumcadiisa waxyeelaya. Wuu tuuray wax alaale iyo wuxuu ka maarmi karay, wuu reebtay wax alaale iyo wuxuu islahaa Mulki ayaad kusoo jiidan doontaa.

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Wuxuu soo iibiyey shumacyo dhowr ah, ubaxyo cascas iyo dhir kaloo aqalada lagu sharaxdo. Wuxuu xaaqinka waxdhuuuqa la raacay sintiimeter kasta guriga. Cajaladihii aflaanta ugu danbeeyey ayuu hore soo dhi gay. Kuraasti ayuu miiska ku aadiyey, sariirti ayuu hoosta ka xaaqay, go'i ka bedelay, daaqadihi ufuray. Suuliga ayuu sidi gaarigi tubo biyo weyn ku dhaqay kor iyo hoos. Sujaayad aanan la bedelin bilo badan ayuu xooray , mid cusub ayuu kusoo bedelay. Wuu goglay, wuu dul istaagay, hareeradiisa ayuu eegay. Wuu ku qancay siduu gurigiisu isku bedelay. Daaqadaha ayuu qabowga ka xirtay, cuud ayuu qolalka oo dhan ku buufiyey,oo rajeeyey in caraftu ilaa beri la gaarto.

Telegram @SOMALIBOOKS

Mulki waxay tareenka soo koitay lixdii aroryaad subax jimce ah. Hal boorso oo ay wadatay waxay saaratay kursiga dushiisa. Intey soo socotay wuxuu tareenku lasoo jibaaxayay dhul dheer oo doog iyo cagaar ah. Waa markii ugu horeysay oo ay ka safarto Göteborg sidii ay Sweden u timid. Boorso gacanta ah ayay xalay soo xirxiratay. Dirac cas iyo mid madow oo caleemo dahabi ah leh ayay soo gashatay boorsada, cadday iy o kareemkiisi, shaambo ay ku qoran tahay Oliver iyo saabuunteeda, boorso yar oo ay ugu jireen jijimo iyo silsilad, faraanti dahab ah ayay gees ku hubsatay. Suufka caadada iyo labo kastuumo ayay bac yar ku qarisay oo dharka

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

ugu hoos marisay. Intey soo socotay rajadeedu wey sareysay. Hammigeedu iyo riyadeeduna sidoo kale.

Waxay kasoo degtay tareenki X2000 sagaalki iyo labaatan daqiiqo. Stockholm oo q oraxdu wada iftiimisay. Waa maynus toban cimiladu. Qabowgi Göteborg kan stockholm ayaa kala qaboow. Maadaama qorax jirtay oo cirku furnaa qaboowgaa waxaad mooday inuu ka qaboobaa labatan digrii iyo ka badan.

Rakaabkii tareenka ayaa isdardarayay mark ii tareenka albaabada loo furay. Sidi xoolo oodi loo feyday ayaa garbaha la isla dhacay. Qaarbaa degdeg ku jirtay oo kuwa kale dardarayay, kuwana boorsooyinka ay jiidayaan ayaa dadka waddada ka cidhiidhinayay. Codka maykarafoonka ayaa si joogto ah u dhawaaqayay. Rakaabka usocda Göteborg waxuu tareenkoodu ka baxayaa maxaadada 2B, rakaabka usocda Kalmar...Rakabka kasoo degay tareenka kayimid Oslo oo ku bedelanaya tareenka usocda Umeå waxay ka baxaaan maxaadada 3D...

Telegram @SOMALIBOOKS

Mulki codkaa dhegaha uma dhigeyn waayo dan kama laheyn oo wey timid Stockholm oo uu safarkeedu ku ekaa, waxaa keliya oo ka maqnaa Axmedkeedi, wiilki ay dooneyso iney isku dhiibto oo uga warranto dareenkeeda hoose. Rakaabkii soo degay ayay dhex qaaday iyadoo qoorta taageysa si ay indhuhu uqabtaan

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Axmedkeedi. Bidhaantiisa ayaa meel fog uga muuqday. Waxay aragtay inuu isna arkay. Dadkii dhinaca usocday ayuu dhinicii kale usoo jiiray si uu boorsada uga qabto Mulki. Tii uu darteed maanta shaqada fasaxa uga soo qaatay, tan uu darteed xalay guriga u nadiifiyey. Tan uu damaca ka galay.

Si fudud ayay shafka isku saareen, dhabanada is taabsiiyeen. Boorsadii ayuu ka qabtay. Gacanta midig ayuu boorsada ugu jiidayay. Wuxuu damcay inuu gacanta bidix dhex deeda madagta ah qabsado oo xagiisa usoo jiito. Waxaa labadoodaba indhahooda ku dhacayay dadka sidoodoo kale tareenka agtiisa ku kulmaya. Kuwo soo dhaweeynaya iyo kuwo lasoo dhaweeynayo. Hab ayay isi siinayeen badankoodu. Qaarbaa bushimaha isi saarayay, kuwaa dhexda iyo garbaha is heystay oo hortooda socda. Wuu hubaa inay Mulki ay intaa aragto. Dhexda qabso oo xagaaga usoo jiido ayuu dhowr goor damcay. Laakiin wuu adkeystay oo gabadha ha ka nixin ayuu isku sheegay.

Telegram@SOMALIBOOKS

Dhinaceeda ayuu socday inkastoo jirkoodu isku dhawaa. Waxay ka baxeen T -Centralki. Gaarigiisa oo meel aan fogeyn yaalay ayuu ciyaha uriixay. Albaabadi ayaa hoosta ka furmay. Ilinka ayuu ka furay oo ka xiray markey fadhiisatay. Albaabki dambe ayuu furay oo boorsadeedi udhigay. Kadibka

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

albaabki darawalka ayuu iska furay oo soo dhinac fadhiistay Mulki. Indhahoodi ayaa isku dhacay. Isku dhawaa!

- Waa marki kuugu horeysay Stockholm sowmaaha? Ayuu weydiiyey.

- Stockholm adiga iyo baabuurkaada bas ayaan ka aqaan! Ayay tiri iyadoo soo xasuusineysa inuu gaarigan ku qaaday hada kahor. Waxay xitaa xasuusataa barafuunta ka dhex carfaya gaariga.

- Haa maalinki aan Göteborg joognay ayaan meel idin geeyey sowmaaha!

Telegram@SOMALIBOOKS

Inkastoo aqalka Axmed uusan saa uweyneyn hadana wuxuu Mulki ula muuqday aqal si fiican u goglan. Kuraasta miisaska, sujaayada, sawirada derbiga kudhegen, daaqadaha iy o albaabada waxoo dhan wey ka duwanaayeen aqalada dhowrka ah oo ay Göteborg ku aragtay.

Sababta waxay aheyd inuu Axmed kunoolaa aqal la dhisay boqolaal sanadood ka hor oo dhowr goor la dayactiray. Sida loo dhisi jiray aqalada berigaa ayaa ka duwan aqalada ay Göteborg ku aragtay oo aalaaba la dhisay xilli dambe. Alaabta utaala isagaa doortay oo waxay la jaanqaadayeen aqalka cimriga dheer. Kuraasta wey ka lugo dheeraayeen kuwey taqaanay. Markey salka saaratay ayay garatay. Nalka kama soo laalaado dusha ee w aa ul taagan oo kuraasta dhinac taala. Kushiinkiisa

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

makiinada wax lagu kariyo waxay aheyd mid taraq lagu shido. Suuliga ma laheyn barkad ee waxaa kuyaalay oo qudha tubo biyo kasoo daataan. Qolki jiifka ayuu soo tusay, kii fadhiga, kushiinki iyo suuligi iyo barandada dibeda kutaala.

Boorsadeedi ayuu udhigay qolka jiifka. Wuxuu yiri kushiinka nasoo fadhiisi. Wuxuu weydiiyey qaxwe mise shaah?

- Shaah isii qaxwe ma heyside! Ayay tiri iyadoo eegeysa koombo ay ku qoran tahay Coffé

- Qaxwe iyo kafee sow isku mid ma aha? Ayuu imtixaamay.

- May ayay tidhi qaxwe waxaa la dhahaa qaxwe soomaali. Kafeena qaxwo gaalo!

- Labaduba bun ayaa laga sameeyey sow maaha! Ayuu sii imtixaamay

- Khamradaba canab ayaa laga sameeyeyaa qaar. Canab iyo khamro ma isku mid baa? Ayay ka jawaabtay imtixaanki

Miyey ku baastay imtixaanka? Mise waa madax-adeygii ay qaraabada ku sheegi jireen? Wuxuu soo hordhigay doolsho uu biibito kasoo iibiyey intuusan tareenka ka doonin saaka. Koob shaah ah ayuu soo dhinac dhigay. Isagina horteeda ayuu intaa in la eg lasoo hor fadhiistay. Qoraxda ifkeeda wuxuu soo dhaafayay daaqada, wuxuuna ku dhacayaa

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

miiska ay hareeradiisada fadhiyaan. Axmed gadaashiisa waxaa yaala armaajo buugaag ku camiran tahay. Mararka qaar iyadoo buugaagta eegeysa oo isweydiineysa waxa uu akhristo ayuu isna moodayay inay isaga eegeyso.

- Kusoo dhawoow Stockholm! Ayuu koobki shaaha ahaa kor uqaaday. Iyadoo aanan hubin in filicku sax yahay ayay gacan yaaban kuqaaday koobkeedi oo kiisi ku dhufatay.

■■■

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

CUTUBKA TODOBAAD

Duhurki markey qadeeyeen ayuu kaxeeyey. Sagaalki fiidnimo ayay kusoo noqdeen aqalka. Wuxuu soo mariyey wadooyinka Stockholm. Gamlestaden, wuxuu soo tusay aqalo uu islahaa wey xiiseyneysaa. Balse uu ogaaday inuu qalad wax u cabirtay. Wuxuu geeyey aqalo dadka dalxiiska uyimid Stockholm ay booqdaan. Boqoradii hore guryo lagu aasay. Guriga ganacsiga Sweden bartamaha u ah. Musiyumyo kala duwan. Guriga boqorka iyo baarlamaanka sweden ayuu soo tusay.

Markey dhinac marayeen guriga dowlada sweden degen tahay oo la yidhaahdo *Rosenbad* ayuu gacantiisa teeda la helay. Sacabadi ayay isku qabteen iyagoo midna midka kale weydiineyn inay okey tahay.

Restaurant Wova ee Sveavägen ayay casho ka cuneen. Markey kasoo baxeen wuxuu farta ugu fiiqay aqal dheer. Wuxuu farta ugu fiiqay daaqado safan dabaqa shanaad. Wuxuu tusay daaqad ifeysa...kow, labo daaqada sadexaad ayuu yiri waa xafiiskeyga. Maalin baankusoo tusayaa.

Sergelstorg ayay soo mareen magaalada oo nalal wada ifayaan. Dadka talaabadooda degdeg baa kujirtay. Qaboowga jira waxaa

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

wehliyey dabeyl wejiga dharbaxeysa. Jaakado waaweeyn iyo kabo askareed ayay dadku badanaa qabowga kaga lebisnaayeen. Daaqadaha Lindex, H&M iyo Burger King ayay soo dhinac socdeen ilaa ay kasoo gaadhaan riddarholmen. Habeenkaa Mulki ma hubto laakin waxay qiyaastay inay socotay wax aad u badan.

Iyagoo daalan ayay soo mareen Olofstorg oo ahaa suuq u dhow aqalka Axmed uu kunoolaa sagaalka sanadood. Waxay ku leexdeen dukaan kireeya filimanta. Wuxuu salaamay ninki dukaanka iibinayay. Axmed wuxuu ahaa rukun ay garanayaan. Daqiiqo badan markey xul ku jireen ayay labo filim lasoo baxeen. Sagaalki fiidnimo ayay kusoo noqdeen aqalka. M aalintii koowaad ee booqashadeeda Stockholm Mulki meeshaa ayuu ku dhamaaday Sadex maalin oo kale ayaa u haray sidey ballantu aheyd.

Telegram@SOMALIBOOKS

Kolkii filinkii dhamaaday ayay isweeydiisay halka uu ugu talagalay inay caawa kala seexdaan. Sariirta weyn oo ay ku aragtay qolka jiifka mooyee ma arag joodari iyo sariir kale. Iyadoo weli fadhisa ayuu kacay, weelashii horyaalay oo ay ka dhameysteen bataatiga iyo cabitaanka ayuu kushiinka u qaaday. Isha ayay la raacday. Kushiinka ayuu galay, wuu ka soo noqday.

- Waad daalan tahay ayaan u maleynayaa? Ayuu weydiiyey.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- Haa! ayay tiri, inaan qubeysto ayaan doonayaa intaanan seexan laakiin. Ma jirkaa dhididay socodka dheer oo ay maanta soo socotay? mise waxay islaheyd intaad suuliga kujirto oo aad qabeysaneyso ayuu kasii fekeri doonaa meel uu ku seexiyo caawa.

Si ay tahayba suuligi ayay gashay.

Dharki ayay iska dhigtay intey biyihi fur tay. Gacanta ayay ku taabatay biyaha, waa qandac. Tubadi ayay wareejisay si ay biyuhu intaa uga kululaadaan. Biyihi ayay sugtay intey ka kululaadaan. Waxay hor istaagtay miraayada la isku eego iyo khaanad ku agtiilay . Khaanadii ayay furtay. Aayar ayay ufurtay. Waxay eegtay waxa ugu jira. Dhalo barafuun ah ayay soo dhifsatay. Sanka ayay saartay. Wuxuu u carfay barafuun rageed, wey iska dhigtay. Qoryaha dhagaha lagu masaxdo iyo waxay ishu qabatay baakad kaniiniga madaxa ah. Alvedon! Ayay garatay. Makiinada garka lagu xiirto iyo shaambo garka la mariyo intaan la xiirin. Ayay isha lasii raacday. Saliida timaha, cadday, barafuun kale, qarsho ka yar tii hore. Wey u xirtay. Biyihi ayay misna taabatay. W ey kululaadeen. Waa intey dooneysay.

Markey daqiiqado dhowr ah biyaha xanxanteeyeen maqaarkeeda cagaha ilaa madaxa, ayay soo xasuusatay inaysan heysanin shaambo iyo saabuun toona. Ma kudhacdaa inay iyadoo qaawan Axmed

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

udhawaaqdo. Oo ku tiraaho boorsadeyda iiga soo bixi shaambada Oliver ay ku qoran tahay iyo saabunnteeda?

Isagaba hadey u dhawaaqdo wuu maqli lahaa. Maxaa yeelay qolka fadhiga ayuu fadhiyey keligii, maadaama xilli dambe ay aheydna jabaqda wey yareyd oo biyaha suuliga ayaa jabaqdoodu soo gaarayeen.

Maya! Kuma dhacdo. Biyaheedi ayay iskaga soo qabeysatay. Markey soo baxday ayuu ku yiri sariirta ayaan kuu sii diyaariyey ee waa inoo subax dambe, qudheydu waxaan doonaya inaan qabesytee. Maalinti oo dhan ayay soo socdeen oo qabeys jirku wuu doonayay.

Telegram@SOMALIBOOKS

Waxaa Mulki u muuqday inuu Axmed go’ iyo barkin qolka kala soo baxay oo kursiga qolka fadhiga soo saartay. Qolkeedi ayay gashay oo sariirta dhinaca la heshay. Maalin caadi ah ma aheyn! Sidey tareenka saaka usoo kortay indhaheedu waxay arkayeen waxyaalo aysan arki jirin. Dad ha noqdaan, wadooyinka iyo aqalada caasimada. Jirku wuu daalnaa, biyihii qandaca ahaa ayaa kala saaray xibnihi daalanaa. Intuu suuliga kujiray Axmed ayay gama’day.

Malntii xigtay wey kasoo hor toostay. Waxay usoo talaabsatay kushiinka. Qaxwo ayay saartay, koob ayay shubatay markuu karay.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Miis kushiinka yaalay ayay fadhiisatay. Daaqada ayay eegtay, ceeriyaamo iyo cir xiran ayay eegtay. Waxay ka doorbidi laheyd qoraxdoo ifkeeda khalqiga soo gaarsiisa subaxaas arooryaad. Waxay ka doorbidi laheyd iyadoo aqalka ay xalay seexatay lagu qabo. Iyadoo arooryadaa usoo toostay inay seygeeda quraac udiyaariso. Waxay doorbidi laheyd in loogu yeero Mulki, Axmed xaaskiisa! Laakiin waxay dhex fadhidaa arooyadaas winterka ah, kushiin ku yaala Stockholm, waxay xalay seexatay aqal uu la jiifo nin aan diintu u baneynin. Muxuu odhan lahaa wiilkeeda hadey uga sheekeyso halka ay joogto?

Iyadoo feker labo la kala ah. Ayuu soo toosay Axmed. Markuu suuliga galay oo biyo kulul iskusoo shubay ayuu kushiinka ugu yimid. Qudheydu dadka aroorti soo toosaan ahaan jiray ma ogi saaka waxa igu dhacay ayuu ku yiri.

Telegram@SOMALIBOOKS

- Kursiga sidaa miyuu u macaanaa aad xalay seexatay? aan caawa kaa bedeshee? Ayay kula xifaaltantay.

- Mise socodkii dheeraa oo aan soconay shalay ayaan la daalanaa? Ayuu dhinac kale wax ka tusay.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Wuxuu soo saaray birta canjeerada lagu kariyo. Wuxu khaanad kasoo saaray ukun afar xabo ah. Qasac ay kujirto hilib jarjaran, bac ay kujiraan khudaar, yaanyo iyo barbarooni iyo basal. Daqiiqado yar kadib wuxuu soo hordhigay quraac kaalay arag ah! Isha ayay ka dheeregtay siduu raashinka ugu soo hagaajiyey saxanka.

- Maansha allah! Ayay tiri khatar aa tahee

- Wax badan yaan keli noolaa Mulkiyeey! Ayuu uga waramay noloshiisa.

- Ragoo dhan adiga camal ma aha! Ayay ku ammaantay

Quraacdi ayay hadalkoo yar cuneen.

- Maxaa maanta noo qorsho ah ayay weydiisay.

- Maanta waxaan jeclaan lahaa inay samar tahay. Waxaan qaadan laheyn doomaha u baxa Stockholms Skärgårdar. Waxaan picknick noogu sameyn lahaa beeraha Stockholm. Laakin waa winter! Dhib malaha! Ayuu niyada u dhisay. Waxaad joogtaa Caasimada wadanka! Ayuu usheegay in doorku badan yahay.

Qadadi weli waxay joogeen aqalka. Wuxuu kasoo adeegay dukaanka aqalka agtiisa ah. Wuxuu uballanqaaday inuu u karin doono cunto ay jeclaan doonto. Markey uga war rantay inay cuntada talyaaniga ka hesho. Pasta lasagne! Ayuu yiri ayaan inoo sameynayaa

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

maanta. Dhexda ayuu usoo xirtay. Muusik ayuu shitay. Qeydka xabadka lagu xirto marka raashinka la karinayo ayuu soo xirtay.

Waxay kushiinka ugu timid isagoo ansalaato wax u eg jarjaraya! Dhabarkiisu ku foorarar o miiska uu mindida la agtaagan yahay. Ilinka iyadoo taagan ayay ka eegeysay. Wuxuu u ekaa inuu mashquulsan yahay. Mindida uu gacanta ku hayo ayay isha la raacday, dhag dhag dha g ayuu ku hayaa.. markuu kusoo jeestay ayay ku qososhay qeydka uu xiran yahay!

- Sida aad ugu qurxan tahay! Ayay tiri iyadoo qosleysa, afka ayay gacanta saaratay.

Jirkeeda ayuu eegay. Adiga wuu kula egyahay! Ayuu yiri hadaad rabtid Göteborg uqaado! Mindidi ayuu dhinac iskaga dhigay. Xageedi ayuu usoo dhaqaaqay. Isagoo eegaya jirkeeda. Waa run wax sidaa ah igama balaadhna aniga! Ayuu istusay. Wey dhuuban tahay, caloosheeda kama muuqato inay caruur dhashay. Diraca cas oo ay ku lebisan tahay ayuu eegay. Waa dirac howshiisi gabay! Aaway jirkii la yiri astur? Indhaha ayuu sidii rasaasti diraca dhex qaaday. Qaarkii kore ayuu isha la maray. Ma muuqdaan laakiin wuu qiyaasi karay naasaheedu inay taagan yihiin weli. 27 sano! Ayuu isku sheegay. 27 jir weeye, anigana afartan. Tolow goormey dhalatay ayuu isweeydiiyey. Waxaan kujiray fasalka lixaad. Hooyadeed waxay foolatay anigoo subax usii

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

socda dugsiga hoose dhexe ee Dhagaxtuur! Ayuu xisaabiyey. Dhex anigoo sii maraya ayay malaha dunida timid. Dhexda ayuu qabtay iyadoo weli ilinka kushiinka agtaagan. Xagiisi ayuu usoo yara jiitay.

- Maxaad ku barisay xalay horta? Ayuu isyiri ogow sirteeda. Xalay ma igu riyootay? Anigoo quraac ku karinaya miyaad ku riyootay?

Garabka ayay aayar uga dharbaaxday labadooda calool oo istaabanaya. Aqas! Waryaa maxaa imooday aniga!

Ma dabaqa sarey tagtay? Soo deg! Walaa leey! Ayuu niyada ka yiri. Baali ahoow! Ayu uyiri. Waxaanse ku mooday ti aan hablo darteed uga go'ay ayaamahan. Taan isleeyahy hubso inay kula wado. Taan…

Telegram @SOMALIBOOKS

Maxey uwada dhageysan weyday geerarkiisa. Ukaadi ukaadi ayay kutiri intey iska riixday. Waan kula wadaa…hadaan kula wadin Stockholm maanan joogeen maanta. Aqalkaaga ma seexdeen xalay, kuma soo waceen, ma fahantay?

Wuu qiyaasay iney soo wado ereyga "...laakiin"

Laakiin – ayay tiri. Aniga gabar ma ahi, hooyo ayaan ahay wiil afar jir ah leh. Qof cayaar rabtana ma ihi. Waan kaa helay waa run, subaxaan ku arkay ayay laabteydu nagaad dareentay, anigoo rag ka quustay ayay

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

nafteydu rajeysay maalmo badan oo wacan oo soo socda.

Waan fahmay ayuu yiri isagoo usii cararaya raashinki dabka saarnaa. Foornada hoose ayuu furay. Saxan weyn oo pasta lasagne ah ayuu kasoo saaray. Heesti ushidneyd ayuu gaabiyey si uu hadalkeeda u dhageysto.

- Dheeree! Ayay ku amartay heesta. Wuu soo eegay. Wuu dheereeyey.

Saw goor barqa ahoo, bishu ay siddeed tahay, aniga iyo beerlula isku maanan soo bixin. Ayuu ku heesayay codka ninka ka warramaya sida loo helay…

Timo boqonta joogoo, baal goray la moodoo, baarkana casaankii bidix midig is gaadhoo, bul cad lagu sideeyo, badh ku seexanaysoo, barkanaysa qaaroo, huwanaysa baaloo, igu beertay lah ashoo, u buseelay maan baran.

Iyadoo ereyadii la heeseysa raadiyaha ayuu usoo dhawaaday. Jirka ayay usoo dhaweeysay. Shafka ayuu ku qabtay. Gacmaha ayay garbihiisa saaratay. Wey isku dhiibtay!. Waxay uga dhigneyd inuu Axmed iyada ereyadaa u heesayo. Sidaa weligeed Axmed ka hor nin aan qabin uguma aysan dhawaanin. Waxay dareemeysay in jirkeeda lagu diddayo, wax aad sawaariikh moodo inay xubnaheeda dhex

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

jibaaxayaan. *Sidi ruux qorey dhegta kula jira* siduu dareemo ayay dareentay.

- Wax aanan xalaal aheyn aniga kaama doonayo abaayo! Ayuu ku yiri iyagoo qad dadi wada cunaya. Laakiin sidi ninki heesay uu yiri waxaan islahaa *aabaheed hubso*. Aniga kuma aqaano runtii Mulkiyeey. Waad ii sheegtay in aad wiil leedahay. Aabihii waa ayo? Xiriirka idinka dhaxeeye waa sidee? Wiilkaa mooyee wax kale miyaa idinka dhaxeeya?

- Wiilkeyga Muxsin baa la yiraah. Aabihiisna Muuse. Sidaan taleefanka kuugu yara taabtayba Muuse iyo aniga nolol naar ah ayaan isla soo marnay. Ma aha khaladkeyga, ama kiisa laakiin calafkeenaa dhamaaday. Intaan kula kulmin rajadeeyda raga aan ka qabo aad ayay u yareyd. Waxaan islahaa wiilkaaga iska korso...Laakiin barqadaan ku arkay ayaan istusay mid barwaaqo iigu yeeraya. Habeeno badan ayaan boholyow la soo baraarugay...waxaan iska dhaadhacsiiyey, aan ka rajeynayaana, inaan fahantid inaan kuu haraadanahay. Waxaan Goteborg uga soo banaanbaxay daraadaa, waxaana rajeynayaa inaadan cidlo igu beyrin.

Telegram@SOMALIBOOKS

- Waa dhab, mana inkirayo inuusan weli madexeygi isiinin. Ayay hadalkii sii waday.

- Yacni kuma furin ninkaad wiilka udhashay? Ayuu hubso isyiri hadalka.

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- Haa ma ifurin weli, madaxeyga ma isiinin. Rag badan ayaa u tagay. Wuxu ku yiri dumarkiina markaad soo furtaan ayaan Mulki furayaa anigana! Laakiin weligiis ima qabi doono. Waxaan kala maqan nahay hada sagaal bilood. Xilli baana jira fasaqu banaan yahay. Waan kula wadaa, rajadeyda aniga iyo adigana waa ugub laakin wey adag tahay ee marlabaad waxaan kaa rajeynayaa inaadan cidlo igu beyrin.

- Badbaadaadi nafteydaay! Ayuu yiri. Waan niyadjabsanaa intaanan ku baran. Waxaan islahaa Gabar soomali ah iyo aniga isma keeni kartiin. Dhaqankaagu wax badan buu milmay oo gabar soomali ah oo dooneysa inay kula noolaato ma jirto. Markaan ku arkay waxaan dareemay sidii inaan ku aqaanay weligeey. Sida xariga kuulaha tusbaxa isku haya, ayaan dareemay in dhexdeena xarig ku xiran yahay . Waxba maleh hadii aan weli lagu furin. Waan ku sugayaa. Intaana waan wada socon karnaa oo barasho waa loo baahan yahay intaanan aqalgelin.

Telegram@SOMALIBOOKS

Aqlgelin! Ereyga wuxuu ka qeyliyey madaxa Mulki. Farxad ayay la caaratay . Maanta maxaa noo qorsho ah ayay tiri iyadoo miiska ay fadhiyeen ka kaceysa. Saxamadi ayay ka qaaday isagoo fadhiya. Koobabki ayay usoo laabatay. Jeeg ay cabitaanka ka cabeen ayuu talaagada isna u qaaday.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Waxuu qorshuhu ahaa inay sadex maalin la joogto, laakiin waxay Stockholm joogtay lix maalmood. Globen ayuu u kaxeeyey fanaan mareykan ah oo Stockholm inuu ka heeso uyimid. Live!. Fiidka waxay ka dhaxeeyeen restauranti casho romantic ah ay ka cunaan, dabadeedna maad iyo majaajilo kusoo raaxeystaan maqaaxiyaha Stockholm. Mararka qaar waxay soo kireysan jireen filin cishqi ah , kolkaasey iyagoo hoosta iskaga jira isku ag gam'i jireen filinki labaad oo socda. Markuu midkood soo tooso kan kale ayuu sariirta geyn jiray, halkaa oo ay sariirta weyn go'eeda hoosta ka geli jireen.

Maalintii todobaad ayuu usoo anbabixiyey Göteborg. Axmed weli wuxuu kujiray fasax ila bisha janaayo shanteeda. Laakin wuxuu soo ambabixiyey bishi janaayo oo sadex ah. Waxaa Mulki loo soo sheegay inuu Muuse magaalada joogo, wiilkooduna uu la socdo. Muuse wuxuu u guuray Malmö halkaa oo uu shaqo ka helay.

Tareenka iyadoo fadhisa ayay u gacan haatiysay Axmed. Qaboowga dibeda ka jira wuu badnaa, gudaha tareenkana kul iyo uumi ayuu ahaa. Daaqada miraayada ah ee tareenka gudihiisa iyo dibeda u dhaxeysay waxaa ka muuqday uumi sidi ceeriyaamadi. Axmed intuu daaqada tareenkii soo dhinac istaagay ayuu daaqadii ku sawiray wadne jaceyl! Mulki ayaa isku sheexday markey aragtay islaan dhinac

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

fadhisay oo la dhacday ficilka Axmed u usameeyey.

■■■

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Xiriirkooda maalmihi, bilihi raacay wuxuu u badnaa sheekada taleefanka ee fiidki la isi soo waco. Markuu shaqada ka yimaado, oo casheeyo ayuu isku diyaarin jirin maaddada uu caawa doonayo inuu kala sheekeysto. Iyada sidoo kale ayay Muxsin sariirta geyn jirtay sideeda fiidnimo, si aysan u gafin taleefanka Axmed, wiilka Stockholm ay ka caashaqday.

Xawaaraha uu kusoocday jaceylka dhex maray Axmed iyo Mulki aad ayuu dheereeyey. Waxay ka go'een dadki intiisi kale. Sidi inay wada noolyihiin ayay isku filaadeen. Isna Stockholm shaqada kadib iyaduu isku diyaarin jiray la hadalkeeda, iyadana sidoo ayay isaga isku diyaarin jirtay fiidki intey barkin hoosta gashato ayay taleefanka codkiisa suggi jirtay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Fiidki intey suggeyso ama uu suggayo waxay isku sii mashquulin jireen emailada ay isku soo direen. Wuxuu usameystay khaanad/folder khaas ah oo uu ubixiyey Mulki.

Habeen ayay kusoo dhacday inuu akhriyo waraaqaha ay usoo qortay. Markuu eegay waraaqaheedi ayuu ogaaday inuu warqadeedi koowaad ka helay labo bilood ka hor. Bilowgi bishi janaayo ayaa ku qoran taariikhda. Wuu riixay warqadeedii koowaad.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Salaamo! Ayay ka bilaabatay.

Waxaan aan kaaga mahdinayaa dalxiiski aan kusoo qaatay Stockholm todobaadkii hore. Si fiican ayaad iisoo dhaweysay. Safarkeygi labo ayaan mar isla caashaqay! Axmed iyo Stockholm! Waa magaalo aan ka helay Stockholm. Axmedna waa wiilka uu calankiisa ii suran yahay!

Caawa ayaan kula soo hadlayaa!

Mulki

Tan ay laabteedu kujeceshahay!

Wuxuu riixay warqad uu udiray bishi febraayo bilowgeedi. Wuxuu xasuustaa inuu warqadaa qoraalkeeda wakhti badan kor fadhiyey. Sidi arday imtixaan u fadhiya ayuu intuu hayay isku beegay, ereyadi kala shaandheeyey, akhriyey, masaxay, misna qoray oo akhriyey ereyadii uu uqorayay. Wuxuu xasuusanayaa inta koob oo qaxwo ah jirkiisa cabay intuu qoraalka warqadaa u fadhiyey. Waxay aheyd xilli dambe habeen markaa uu warqada qorayo. Waxaa da'ayay baraf aanan ceynkiisoo kale Stockholm ka di'in intuu xasuusto. Dadku badankii wey jiifeen. Isaguse waxbaa hayoo uu islahaa ugudbi Mulki, gabadha uu wehel ka dhigo islahaa.

Mulkiyeey abaayo, horta waan kusalaamay. Salaan kadib waxaan xiriirkeena u rajeynayaa guul iyo geyi nabad ah. Runtii hadaan kuu

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

warramo walaalo waayahanba xagaagaa la iga heystaa, sidaan horeyba kuugu sheegayba. Ma nasto habeenadan, nafis uma casheeyo, hadmaad heli halyeydaadi, hadmaad gaari doontaa hawadaada, halmid ah noqon doontaan ayaan isweydiiyaa.

Mulkiyeey abaayo, runtii farxadeydu waa adiga. Wakhtigu orod badanaa, waxaan xasuusanayaa habeenkaan Göteborg kasoo noqday oo aan maqlay codkaaga! Waxaan xasuusanayaa xilliga dheer oo aan taleefanka dul f adhiyey oo aan islahaa wac, ha wiin...wac. Intaa aamusnaayoo afka gacanta iisaarneyd. Imisaan habeenkaa riyo ku meereysanayay aqalkaaga Göteborg, imisaan taleefanka la hadlayoo aan lahaa caawa usheeg beriba yeelkadeede. Hadana aamusoo afka gacanta saartay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Mulkiyeey abaayo, intaan cajaladda codkaaga kusoo ceshceshanayay habeenkaa waan liicayoo lulanayay, leydh macaan sideedi yaan codkaada ku raaxeysanayay.

Mulkiyeey abaayo, markaan dareemay in la ila hadlayo. In cod iga xoog badan ila hadlayo ayaan cajaladi la hadlay. Marar badan baan damcay inaan kuu sheego inaad tahay aayihii nolosheydiyo, if tiinka indhaheygiyo, udug aan jeclahay.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Mulkiyeey abaayo, waxaan kugu qiyaastaa sidii ubax deyr baxay, waaberi if tiimay, ubadkeyga hooyadood. Waxaana rajeynayaa inaan wax intaa udhigma aan kuula mid ahay.

Mulkiyeey abaayo, ayaankeygu waa adiga, cawadeyduna waa anigoo ku arkoo aroor walba ku eegta.

Mukiyeey abaayo, jaceylka aan kuu qabo ma aha mid aan qalin iyo warq ad kusoo koobi karo. Lakiin hadaan qiyaaso waa mid ciidda ka tiro badan, onkodkana ka dheereeya, cadceedana ka if tiin badan.

Mulkiyeey abaayo, waxaa iga talo ah inaan isku dhaafin howlaha cishqi, garanmeyno goor aan go'eynoo godka aakhiro tageynee!

Kan isagoo ilo biyo ah ag jooga kuu ooman!

Axmed

Telegram @SOMALIBOOKS

Markuu fiidkaa akhriyey ereyada uu bil ka hor u qoray Mulki, ayuu isku dhoola cadeeyey keligii! Yes! Wuu ku qanacsanaa ereyada siduu iskugu hagaajiyey. Ma ahaayeen ereyo uurka ka yimid? Mise suugaanta ayuu ku fiicnaa kol haduu macalin soomaliga dhiga ahaan jiray 22 sano ka hor?

Isma weydiin inay tuhuntay ereyediisa, ee wuxuu isweydiiyey "tolow imisa mar ayay kusoo ceshceshatay akhrinta warqadan?"

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Kulankoodi labaad waxay mar labaad ugu timid Stockholm. Laakiin tookadan si ay uga safraan Stockholm. Waxay ahayd bishi apriil bilowgeeda. Waxaa lagu jiray ciida Påsk ee laga ciido Sweden. Todobaadkaa waxaa xirnaa iskuulada iyo goobo shaqo oo badan. Muuse ayaa wiilkiisi kasoo doontay iy adana Stockholm ayay soo aaday.

Markuu Axmed u ballanqaaday inuu geyn doono meel qoraxdu ka ifeyso, jirkuna dhididayo, maalintuna dheer tahay, habeenkuna mugdi dam ah yahay, wey ka diidi weysay. Wuxuu usoo gooyay labo tikid. Waxaan ku geeynaya ayuu yiri Turkiya, magaalo uu magaceeda ugu sheegay Alanya! .

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxay aheyd bishi april. Sagaal biloode ugu danbeeyey waxay ku noolaayeen baraf iyo qaboow aanan ixsaan laheyn. Iska qoraxda ayaa indhahooda ku yaraa. Shan maalmod ayaan soo joogeynaa ayuu kuyiri Alanya, kharashkana anigaa qaba. Waxkasta!

Maxay kudiidaa?

Waxay tareenka kasoo degtay Stockholm, sagaalki subaxnimo iyo rubuc, sidii ay december sanadkii hore uga soo degtay oo kale. Khalqigi lasoo safray ayay taalaabada la qaaday ilaa ay la kulanto Axmed oo hal kaa kusugaya. Wuxuu ku qaaday gaarigi ay taqaanay. Wuxuu geeyey gurigi ay taqaanay.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Waxay barqadaa ilaa casarki wada joogeen aqalka. Waxay diyaarada raaceen lixdii fiidnimo. Saacad kadib todobada iyo shan daqiiqo ayay ka degeen Alanya.

Waxaa madaarka kula kumay iyaga iyo rakaabka kaleba gabdho shaqaalaha shirkada Fritidresor ah. Waxaa waday Axmed oo hore turkiga ugu yimid dalxiis. Wey daba gashay. Waxaa rakaabki lagu qaaday bas weyn oo kala geynaya hoteeladii loogu talagalay. Magaaladu waxay aheyd mugdi, wax sidaas ah kama arki karin baska dhexdiisa. Waxay yimaadeen hotel Aziz saacada markey aheyd sideedi oo rubuc la’. Waxay buuxiyeen waraaqo resebshinka laga siiyey. Baasaboorka nambarkiisa, wadanka ay ka yimaadeen, inta cisho ay joogi doonaan iwm. Axmed markuu buuxiyey labadi warqadaood ayuu soo qaatay furihi qolkooda.

Telegram @SOMALIBOOKS

Inkastoo safarku gaabnaa hadana jirku si buu u daalnaa. Dhegaha ayaa cuncunayay sidey diyaarada usoo cagodhigatayba Calooshuna hawo inay buuxdo yey moodeen,. Saa oo ay tahay gaajo ayaa heysay. Axmed ayaa ku yiri ilinka hoos kasoo xiro oo ha furin ilaa aad codkeyga maqasho. Waxaan noo doonayaa casho e.

Dibeda ayuu u baxay.

Qolki ayay eegtay. Labo suuli! Ayay aragtay. Mid weyn iyo mid aanan yareyn. Kushiin aad u

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

yar, talaagad buuxda, cabitaan ceyn kasta ah leh. Qolki jiifka ayay usoo noqotay, boorsadi ay sariirta agteeda ku xooreen ayay soo qaaday. Waxay ku riday armaajo derbiga ku dhegeneyd.

Sariir weyn oo labo nafar loog utala galay laakiin afar ay seexan karto ayaa qolka bartamihiisa yaala. Go' xariir ah ayaa ku goglan, ubaxyo ayaa saaran miis sariirta agyaala. Waxay u dhaqaaqday barandadi, daah u dhaxeeyey qolka jiifka iyo barandada ayay iska qaaday, derbi miraayad ah ayay furtay. Barandadi ayay soo istaagtay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Leydh macaan ayaa wejigeeda ku dhacay. Xoog ayay u neefsatay leydhi, sidii inay u oomaneyd leydh ka duwan tii qaboobeyd ee Sweden. Iyadoo barandada taagan ayaa waxaa umuuqday labo, maya sadex barkado oo waaweeyn oo lagu dabaasho. Nal barkada dhinacyadiisa ah ayaa ifinayay. Biyaha hoostooda nal buluug ah ayaa ka shidnaa. Geedo waaweeyn ayaa aaga oo dhan lagu beeray. Kuraas kuwa lagu qoraxeysto ah ayaa safnaa barkada agteeda.

Cirka ayay eegtay iyadoo uu jirkeedu ku dhaceyso leydh naftu ay jecleyd. Cir mugdi dam ah ayaa u muuqday, xidigo cirka ku sharaxan ayay ishu qabatay. Cirka Sweden intey xasuusato kuma arag xidigo sidaan u badan ooo cirka sharaxaya!. Kursi barandada yaalay ayay fadhisatay nafta oo ku

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

raaxeysanaysa magaalada ay dalxiiska ku timid.

Iyadoo leydhu xaada jirkeeda xanxanteey neyso ayay maqashay Axmed oo soo garaacaya albaabka. Wey istaagtay. Waa ayo? Ayay tiri hubso ruuxa soo gargaraacay. Waa anigee iga fur. Codkiisa aayay garatay.

Wuxuu ukeenay dooro iyo hilib shiilan. Bataati la dubay, ansalaato iyo cabitaan khudaar laga miiray. Barandada ayay tiri aan ku cuno cashada. Nolosha sidan ayay ku wacan tahay! Ayay tiri. Nolol laguu adeegayo, neecaaw macaan iyo niyad xasiloon.

Telegram @SOMALIBOOKS

Taleefanka ayay ku dalbadeen cabitaan iyo shaah. Ilaa kow iyo tobankii fiidnimo ayay barandada fadhiyeen. Dayaxa iyo xidigaha cirka sharaaxay oo duljooga ayay is eegayeen, midba kan kale ayuu ku faraxsanaa wehelka uu helay.

Labada suuli ayay kala galeen oo biyo isku soo shubeen. Kuleylka hurka Alanya iyo barafki qaboobaa ee Stockholm ayay iska soo meyreen. Jirka oo yara daalan, niyada oo degen, qalbiga oo xasiloon ayay go'a weyn oo xariir ah hoosta ka galeen.

Maalmihi xigay waxay kujireen biyaha barkada iyo kuwa badda. Mulki wey diiday inay kastuumo xirato oo biyaha ku dabbaalato! Sababta uma sheegin, iney xishooneyso ama

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

inay dabaasha aqoon. Isna ma weydiin ee wuu xushmeeyey go'aankeeda. Kuraasta lagu qoraxeysto ayay usoo jiidatay meel geed hoostiis ah.

Axmed inta badan iyaduu dhinac jiifay laakiin markuu kululaado wuxuu isku tuurayay barkada biyaha ama hirarka badda. Casaradi waxay soo booqaneyeen magaalada ay yimaadeen. Suuqyo qadiimi ah, goobo dalxiisayaasha loo dhisay, iyo maqaaxiyo wadada dhinaceeda ah ayay ku mashaaxayeen. Casarada qaar waxay kusoo lugo baxsanayeen xeebta dheer oo ciideedu cad dahay. Iyagoo isdhinacsocda dhexda iyo garbaha is heysta ayay wada arki jireen ilaah khudradiisa. Qorax ilaa saaka unka if siineysey oo god sii galeysa markii maqrib lasoo gaaro. Maqrib walba sidii maqribki ka horeeyey.

Telegram @SOMALIBOOKS

Nolol xadaarad leh ayaa ka socotay xeebta. Dadka badankiisu waxay ahayeen sidi Mulki iyo Axmed kuwo dalxiis uyimid Alanya, kuwo magaalada ku nool, kuwo irsaaqad usoo doontay ayaa is dhex yaacayay xeebta casarkii. Wiilal iyo gabdho da' yaryar oo turki ah ayaa usoo kala yaacayay Mulki iyo Axmed, si ay wax uga iibiyaan. Waxay tusayeen alaabo ay doonayeen inay ka iibiyaan. Waxay su'aalayeen inay yihiin carab. Mulki xijaabkeeda ayay la yaabanayeen. Madowgeeda ayay mar islahaayeen waa mareykan marna waa carab.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- We are from Somalia. Qaar turkidu ma maqal magaca soomaliya, qaarna wey amakaagayeen oo waxay lahaayen sow dagaal wadankiina kama socdo?

- Haa! Lakiin laakiin wadankoo idil dagaal ma aha! Ayay usharaxeen turkida irsaaqadooda xeebta uyimid casarkaas.

Fiidki inta badan Mulki iyo Axmed waxay fadhiisan jireen maqaaxiyaha dadka dalxiiska u yimid ay ka casheeyaan. Halkaa oo madadaalo iyo cayaaro loogu jili jiray. Xilliyada dambe ee fiidki waxay fadhiisan jireen barandada ay goonida u lahaayeen. Shaqaalaha hotelka waxay diyaar u ahaayeen inay u sadeegaan saacad walba iyo gelin kasta.

Telegram @SOMALIBOOKS

Shan habeen ayay wada joogeen Alanya. Labadooda qof ahaan wey isku soo dhawaadeen. Jirkoodu wuu isbartay, niyadahoodu wey saaxiibeen. Sidi caruus iyo caruusad ayay iskula xifaaltami jireen, iskula sheekeysan jireen shantaa habeen.

Waxay wada jiifteen labo miis oo isdhinacyaal iyagoo jirkoodu badankiis qaawan yahay, halkaa oo loogu masaajeeyey *Turkish Hamam*. Faras qudha ayay wada kireysteen oo fuuleen. Meel walboo ay booqanayaan, meel dugaag lagu hayo, meel masaajo, meel suuq ah, maqaaxi, goob walba waxay socdeen iyagoo gacmaha is heysta, garbaha ama dhexda.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Dalxiiska ay u yimaadeen Alanya waxuu u sahlay inay isbartaan, hadii habeen iyo maalinba ay wada joogeen, hadii ay sariir wada seexdaan, hadii ay habeen isla qabeysteen. Wax badan ayay iska barteen.

Qalbigooda oo saafi isku ah, jirkooda oo qanacsan, laabaha oo cishqi buuxo ayay Stockholm kusoo noqdeen. Barafki ay shanta habeen moogaayeen ayay usoo noqdeen. Weli dhulka ayuu buuxaa isagoo sidi suufki u cad , caadd diq ah ayaa cirka Stockholm qariyey. Dadku waa raran yihin, dhar culus iyo kabo waaweyn ayay ku lebisnaayeen. Dhegaha iyo faraha ayaa qabowga uga dadnaa. Dadka badankiisi talaabadodu wey degdegsaneyd. Mulki habeen ayay seexatay Stockholm kadibna waxay u ambabaxday aqalkeedi iyo Göteborg.

■■■

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

CUTUBKA SAGAALAAD

Bishi juunyo. Sanad kadib markey is barteen Axmed, labo bilood kudhawaad markey Alanya kasoo noqotay ayuu aduunkeedu dumay sidii aqal aaska loo gooyey.

Muuse ayaa loo sheegay inuu guursaday. I yo in dowladu wiilkooda ku wareejisay i saga, oo loo arkay inuu kaga roon yahay korinta Muxsin. Howlwadeenada dowlada oo marar badan aqalka ugu yimid ayaa aqalkeeda kawaayay Mulki. Muuse markuu usoo celin lahaa wiilka ayuu waayay dhowr goor. Isagaa u welwelay nafteeda oo askarta ugu yeedhay. Wuxuu yiri bal aqalka fura, inay nooshahay iyo in kale. Markii dhowr goor la waayay gaabdhii ayuu xafiiska qoyska uwacay. Markey iyaguna dhowr goor gurigeeda yimaadeen waa laga furi waayay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Bishii juunyo. Labo bilood kudhawaad markey Alanya kasoo noqotay ayaa waxaa usoo dhacday warqad loogu sheegayo in Muxsin wixii maalintaas ka danbeeya aabihiis lagu wareejiyey.

Waayo?

Ma warqad baa jawaabta? Xafiiski markey istiri la hadal waxaa lagu yiri wakhti laqabso howlwadeenki go'aanka gaaray. Todobaad ayay keli aheyd, isla hadleysay oo ku sigatay inay dharki xoorto.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Axmed ayay u maciin doono istiri. Isaguna taleefan ayay ku weysay. Email ayay u dirtay, jawaab ma laha. Facebuuga ayay ugu qortay “ waan dhibanahay” jawaab malaha. Cod ayay ugu duubtay taleefanka oo rajeysay inuu lasoo hadlo. Jawaab malaha!

Hadaad dooneysid wiilkaaga, maxkamada dacwo oqoro. Ama qareen qabso! Ayuu howlwadeenki kula taliyey markey labo todobaad kadib la kulantay. Iyadoo uurka ka ooyeysa ayay gurigeeda kusoo noqotay casar qoraxdu kulushahay. Talaagada ayay furtay. Raashin wuu sii dhamaanayaa. Jirka oo itaal daran, maskaxda oo argagaxsan ayay sariirta isku kala xoortay. Ilaa maalintii xigay duhurki ayay huruday.

Telegram @SOMALIBOOKS

Jirka oo itaal daran, calooshu oo maran, wejiga oo ildaro ka muuqato ayay soo toostay. Axmed! Ayay taleefanka misna ku eegtay bal inuu ka qabto. Jawaab malaha. Labo todobaad iyo bar ayaa iskugu danbeeysay. Emailka ayay eegtay. Waxba Maleh!

Waxay tagtay maqaaxi aqalka agtiisa ah. Inteysan bixin sidi caadada u aheyd waxay hor istaagtay miraayada. Ildaro ayaa ka muuqata. Yeelkadeed! Ayay istiri oo aqalki ka degtay. Xabad pitzo ah ayay dalbatay oo guriga usoo qaadatay.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Markey afka gelisay ayaa nabar kusoo booday. Caloosha ayay gacanya ku qabatay. Mindhicarad ayay moodey in wax jiidayaan. Sariirta ayay istiri bal isku kala bixi. Beerka ayay barkinta ku qabatay. Iyadoo gaajeysan ayay gam'aday. Saqdhexe habeen ayay soo toostay. Saacada ayay eegtay. Waa sadexdii iyo rubi. Kushiinka ayay u kacday. Markey pitzadi aragtay ayaa matag qabtay. Suuligi a yay u foorarsatay. Jilbaha ayay dhulka dhigatay. Waxba ma soo dhaafayaan. Indhaha oo guduutay, dhuunkta oo barartay ayay miraayada soo hor istaagtay. Biyo qabow ayay wejiga ku meyratay. Sariirti ayay iskaga noqotay.

Telegram@SOMALIBOOKS

Axmed! Ayay xasuusatay. Ha jiifo! Hada waa hubaa inuu aqalka joogo kuleey! Waa xilli dambe. Ayay isku sheegtay oo wacday. Jawaab malaha. Nabarki caloosha ka hayay ayaa kusii batay. Taleefanki ay gacanta ku heysay ayay kala tuurtay iyadoo aanan kala dhigin. Ilaa lixdii aarooryaad ayay taaheysay keligeed.

Subixii ayay u tagtay waaxda daryeelka caafimaadka ee xaafada. Waxaa la yiri wakhtigaaga caadada ay kuu timaado waa goorma.

- Todobaadki hore ayaa la rabay inay ii imaato!

Waxaa laga yaabaa in wiilkaaga oo lagaala wareegay dartii ay naftaadu u welwelsan tahay.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Waa macquul in nabarka ku haya uu yahay in caadadu kaasoo daahday oo ay kusoo dhaafila'dahay. Dawo ayaa la soo siiyey xanuunka joojiya. Alvedon iyo Ipren.

Todobaadki xigay. Weli maxkamada uma dacwoon, weli qareenki ma qabsan, weli axmed ma helin, welina caadadi uma iman. Waxay marlabaad la xiriirtay waaxda daryeelka caafimaadka ee xaafada. Xanuunki weli wuu i hayaa! Ayay usheegtay. Wuu ka darayaa! Waxaa la yiri kaadi koobkan kusoo shub oo qolka fadhiga iska tag. Naga jawaab sug.

Telegram@SOMALIBOOKS

Mulki oo lugaha kala heysa, dhabarkeedu ku beegan yahay kursiga halka salka la saarto ayuu usoo noqday dhakhtarki. Uur ayaad leedahay! Waad welwelsan tahay, calooshaada waa welwelsan tahay! Ayaa laogu sharaxay xanuunka haya.

Uur?

Dhulki ayaa la wareegay. Dhakhtarki baa la wareegay, naqaski baa ku yaraaday. Iyadoo gacanta la hayo dhulkuna wareeganayo ayaa ugu war danbeeyey. Qolki ayay ku suuxday.

Waxay kasoo toostay dhakhtar kale. Dhakhtarka xaafada markey ku dhacday ayaa ambalaaso lagu qaaday. Waxaa la keenay dhakhtarka weyn oo ay kasoo toostay, Östra Sjukhuset.

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Waxay soo toostay fiid qoraxdu gaaban tahay. Hareeraheeda ayay eegtay Qolka waxaa la jiifa labo gabdhood oo swedish ah. Saacada derbiga kudhegan ayay ishu qabatay. Sideedi iyo toban daqiiqadood. Fiilo sariirta dulsaarneyd ayay badhanka cas u riixday. Waxaa u yimid kalkaalisooyin labo ah.

- Dhiiga ayaa kugu yar! Ayay yiraahdeen. waaxda daryeelka caafimaadka ee xaafada Bergsjön ayaa lagaa keenay saaka!

- Nin ma leedahay?

Nin?, Axmed? Muuse? Yaa ninkeedi ah. Madaxa ayay ruxday. Maya!.ayay jawaabtay. Nin ima qabo. Waxay markiiba soo cogatay shantii habeen oo ay Alanya joogeen. Habeenkee ayaan uurka qaaday? Ayay isweydiisay. Habeenkii labaad? Kii sadexaad? Kii shanaad? Iyadoo naaqane jooge ah ayaa la weydiiyey su'aal kale.

Telegram @SOMALIBOOKS

- Waalidkaa ma dooneysaa inaad xaaladaada wargeliso?

- Waalidkeey ma joogaan Sweden, cid aan wargelinayana ma jiraan inaan uur qaaday. Maya sug sug..walaalkeey usheeg ayay tiri...fadlan ma ii wici kartaa 08-4 55 02. Waxaa la yiraah Axmed, wuxuu ku nooly ahay Stockholm.

- Taleefan ma kuu keenaa si aad adiga u wacatid?

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

- Maya, adinka ii waca oo u sheega in Mulki ay cisbitaal taalo.

Daqiiqado kadib ayay kalkaalisadii kusoo noqotay. Lagama jawaabayo taleefanka! Ayay usheegtay. Laakiin waan tijaabinayaa cabaa r kadib. Saa ulasoco…

Habeenkaa, subixii xigay Axmed waa la waayay. Maxaa ku dhacay Axmed?

Maalinkii xigay o dhan cisbitaalka ayay jiiftay. Maalinti sadexaad ayay aqalkeedi loosoo fasaxay. Waxay goosatay inay Axmed Stockholm ugu tagto. Oo ka waran haduu xa bsi kujiro? Hadii tiisi timid oo uu aqalkiisa kala yaalo? Haduu shaqada safar meel fog ula jiro?

Telegram @SOMALIBOOKS

Markey aqalkeeda timid boost dhulka tiilay ayay soo qaaday, waraaqihii ay dhakhtarka kal timid ayay miiska saartay. Pitzasi oo jeermis kudhasheen ayay qashinka ku tuurtay. Aqalki ayay xaaqin iska marisay, dharki meel walba kala yaalay ayay howl ka dhigatay kala habeyntooda. Naftu wey diiday inay dukaanka tagto oo soo adeegato oo ay qado karsato. Pitzo wey soo nacday. Waa inay raashin cuntaa maadaama dhiigu ku yar yahay. Tareenka magalada ayay qaadatay, waxay fadhiisatay McDonaldska, xabad Big Deal ah ayay isku dhufatay. Iyadoo leecleeceysa oo lalabooneysa ayay guriga kusoo noqotay. Waa labadii duhurnimo. Internetka ayay shiday. Emailka

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

ayay eegtay. Axmed ma soo jawaabin. Waxbaa jira! Sadex todobaad iyo saa'id ayaa iskugu danbeeysay. Fariimo badan ayay udirtay. Jawaab malaha! Waxbaa jira! Waxbaa jira! Waan hubaa waxbaa jira! Ayay isku sheegtay

Malinkii dambe ayay tikid ujaratay Stockholm. Yeelkadeed wixi jiraba, waan soo ogaan doonaa. Habeenkaa hurdada dhaqso ayay useexatay si ay u qaadato tareenka Stockholm u baxaya lixdi arooryaad. Laakiin hurdadi wey diiday. Madaxeedu wuu buuxay, nafteedu wey ildarneyd, qalbigeedu wuu xasiloonni darnaa. Qolka fadhiga ayay soo fadhiisatay markuu dhinacu daalay. Caloosha ayay gacanta ku salaaxday iyadoo tv;ga hor fadhisa. Axmed ! Axmed caruutiisa inay caloosha ugu jirto wey ogeyd.

Telegram@SOMALIBOOKS

Muxuu taa ka odhan donaa? Muxuu odhan doonaa markaan usheego? Meher ma iqabtaa? Aaaa... nabarki caloosha ayaa kusoo booday sidi waranki. Ha welwelin ayuu dhakhtarku usheegay, jirkaagu wuu jilcan yahay wixii gaaray dartiis. *Habar fadhidaa legdin la fudud!* Ayay tiri. Dhakhtarku markuu shaqada ka baxo reerkiisuu utagayaa oo wax welwel ah ma hayo. Aniguse wiilkeygi baa iga maqan. Uur ayaan zino ku qaaday. Ninki caloosha ii buuxiyey mahayo sadex todobaad.

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Wey istaagtay. Soo socsodo ayay istiri. Aqalki ayay hor iyo gadaal usocsocotay. Waraaqihi boostada kuyimid ayay soo qaaday. W axaa ku jira warqad ka timid xafiiska qoyska. Nasiib ayay laheyd, waayo warqada waxaa ku qornaa in laga doonayo ballan loogu qabtay xafiiska qoyska. Waxaan ka wada hadli doonaa- ayaa ku qorneyd- inaad xiiseyneyso wiilkaaga iyo inaad u wada dhaaftay aabihii. Inaad awoodid barbaarintiisa iyo inkale.

Warqadi ayay kala xoortay. Oohin ayay afka furatay. Iyadoo ilinta wejiga ka masaxaneysa ayay ereyadu madaxeeda ka qeylinayeen. *inaad xiiseyneyso wiilkaaga …. Inaad awoodid barbaarintiisa iyo inkale.* Ilaahey meel xun ku gee…Isagaa waxaa ka dhaadhiciyey naagaha ceyrta! Ayay inkaartay Muuse…Ilaahow maxaad masiibadan ii baday…ayay ooysay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Maxaan sameeyaa ayay fekertay markey sariirta kusoo noqotay. Waa labo iyo tobankii habeenimo. Stockholm oo tikidku ii jaran yahay miyaan aadaa, oo soo helaa Axmed? Mise Ballantaan berri subax ah ayaan tagaa?

Wiilkeeda ayay dooratay. Stockholm wey ka baaqatay. Markii ay xafiiska qoyska timid waxaa ku sugayay Muuse, Labo howlwadeeno oo arrimaha qoyska ka shaqeeya. Wiilkooda wuxuu uga soo tagay gabar ballanta la timid, laakin dibeda fadhisa. Waa Muuse xaaskiisa

-----Ka baadho telegram-ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

cusub. Waxay is qabeen sadex bilood. Waxay ku heshiiyeen inay Muxsin la koriso.

Caafimaadkeeda ayaa laga wareystay Mulki.

- Waan fiicanahay.

- Waxaa nasoo gaartay in aad dhawaan dhakhtar kasoo baxday. Maxaa ku hayay?

- Waxba! Ayay inkirtay.

Waxa laga wareystay nolosheeda. Dhinac walba. Ma seexataa? Wax ma cuntaa? Asxaab maleedahay? Inaad is disho ma ku fekertaa.

Mulki wey u adkeysan weysay interviyuga ay bilaa macnaha u aragtay. Interviyuu uma aanan iman ayay tiri! Iyadoo caraysan. Nolosheyda waxba idinkama gelinee wiilkeyga muxuu iiga maqan yahay? Ayay weydiisay. Markii loo jawaabi waayay albaabka ka baxday.

Howlwadeenadu go'aankeedu wey gaareen. Waxay qoreen Mulki waa gabar been badan! Cisbitaal la dhigay ayay tiri waxba maqabi. Qof aanan waxba qabin dhakhtar lama geeyo. Mulki wey dhego adagtahay, mana fahansana wax muhiim u ah nafteeda, wareysigi oo socda ayay naga dhaqaaqday! Muxsin waxaa u fiican inuu la noolaado aabihiis. Muuse noloshiisa wey saleysan tahay. Dawaan ayuu guursaday. Shaqo ebed ah ayuu heystaa. Malmö ayuu aabuhu rabaa inuu wiilkiisa ula guuro. Waxaan soo jeedineynaa in adreeska loo bedelo

Telegram@SOMALIBOOKS

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Muxsin oo lagu qoro aabihiis cinwaankiisa ee Malmö.

Sadex maalmood kadib Mulki waxay sii saarneyd tareen usocda Stockholm. Markey Stockholm kasoo degtay ma garanyenin adresska Axmed. Taleefankiisa weli lama jawaabeynin. Rag soomali ah ayay jidka ku qabsatay. Axmed ma garaneysiin? Maya! Ma garanayaan. Si kastoo ay ugu tilmaantay. Aqal cid soomali ah oo lageeyey ayay ka heshay wiil yar oo ay u duceeysay. Wiilka cidda wuxuu weydiiyey taleefankiisa ma taqaanaa? Haa! Kombuyuutarka ayuu ku qoray. Waxaa usoo baxay Västra Lengatan 3. Odeygi reerka ay kusoo degtay ayaa gaari ku qaaday. Aqalki markii ay garaaceen waxaa ka furay gabar soomaali ah!

Telegram @SOMALIBOOKS

- Axmed ma joogaa?

- Haa.. soo dhaafa? yaad aheydeen? Maxaad dooneysaan? Ayay weydiisay.

Axmed oo codka martida maqlay ayaa qolka fadhiga kasoo kacay. Markuu arkay Mulki iyo odeyga ay wadato ayuu naxay. Wuxuu mooday inuu odeygu aabaheed yahay. Inay dacwo usocdaan. Wuxuu ka naxay inay Farxiyo fahanto qofka uu yahay. Nin naago badan, inuu guurka neceb, inuu sadex caruur ah

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

leeyahay, hadana dumarka indhosarcaadiyo kadibna sariirta uga tago markuu ka bogto.

Markuu Farxiyo iska diray. Odeygii ay wadatayna kuyiri iska hoyo waadna mahadsan tahay inaad Mulki ii keentay. Markey keli isku noqdeen ayuu u sheegay. Mustaqbal kaama doonayo walaal, hadaad raaxo rabtid marwalba Stockholm diyaar bey kuu tahay. Wuxuu uga waramay inuu guurka neceb yahay! Maxaa lugta la iskaga xiraa sidi soomalida jahliga ah? Wuxuu tusay album ay ku jiraan dumar tobaneeyo ah. Tan ma ujeedaa – ayuu yiri – wiil bey ii dhashay. Tana gabar. Waa naago aanan soomali aheyn! Tan ma aragtaa waa soomali gabar bey ii leedahay. Laakiin lug igama xirna!

Telegram @SOMALIBOOKS

Mulki oo meeshi ugu darneyd gaartay ayaa sidii libaaxii qeylisay, oo isagii iyo albumkii isla kala tuurtay. Kursigii uu la dhacay ayay ka talaabsatay, miis meel yaalay ayay gedisay. Tv;gi ayay kala xoortay. Daahi bey riftay, ubax daaqad buuxay bey daadisay... intaana ay sidi aarki cod naxtin Axmed geliyey ku qeylineyso..

Axmed qol ayuu isku xiray. Taleefankii ayuu booliiska la hadlay. Qof waalan baa guriga ila jooga! Ayuu yiri. Kaalaya oo iga saara!

-----Ka-baadho-telegram-ka-@akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

■D■H■A■M■A■A■D■

Telegram @SOMALIBOOKS

-----Ka baadho telegram ka @akhriskaab Only @SOMALIBOOKS

Buugaagti uu hore usoo saaray Bile Hashi

---

1. Intuu dahabku lacagta dheeryahay dumarka dheertahaye

2. Sidee lagu garaa farxad Kaamil ah

3.Haasaawe Jaceyl & Hammi Aduun

4. Sidey noqonba mooyee

5. Xusuusqorkii Leyla

6. Shanbabeen!

7. Maxbus Nr 77

8. Deynabo

9. Calaf

10. Janno

Telegram @SOMALIBOOKS